QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 1, taariikh 20 Dec. 1985: Dhismaha Wakaaladda Shamiintada Berbera.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QAYBTA KOOWAAD
MABAADI' GUUD

Qodobka 1aad
Dhismaha

1. Waxaa la dhisay Wakaaladda Shamiintada Berbera oo hadda kaddib lagu magacaabi doono WAKAALADDA.

2. Wakaaladdu waa hay'ad madax bannaan waxayna leedahay jiritaan sharci ah.

3. Wakaaladda waxaa lagu meeleeyey darajada «A», waxayna yeelaneysaa dhammaan xuquuqda ay darajadaasi leedahay..

Qodobka 2aad
KORMEERKA

Wakaaladdu waxay hoos imaaneysaa Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga oo siinaya tilmaamo isagoo u marinaya Guddiga Agaasinka.

Qodobka 3aad

Xarunta iyo Laamaha Wakaaladda

Xarunta Wakaaladdu waa Muqdisho waxayna awood u leedahay in ay ka dhisato unugyo, laamo ama xafiisyo Degmooyinka kale ee Dalka iyo Dalalka shisheeye, haddii loo baahdo.

Qodobka 4aad
Ujeeddooyinka

— Ka qayb qaadashada horumarinta dhaqaalaha Dalka;

— Hawlgelinta wax ku oolka ah ee Warshadda Shamiin tada Berbera si loo gaarsiiyo heerka ugu sarreeya ee wax soo saarka;

— Soo saaridda shamiinto, nooca loo yaqaan «Portland cement» si loo daboolo baahida Dalka guduniisa, dheerigana dibedda loogu dhoofiyo;

— Ku iibinta shamiintada Warshaddu soo saarto sicir tartan geli kara isla markaana Wakaaladda u ballan qaadaya faa'iido dhaqaale;

— Xoojinta, dhiirrigelinta iyo horumarinta sameynta shamiintada.

Qodobka 5aad

Awoodaha

Wakaaladdu waxay leedahay awoodaha soo socda:

1. In ay yeelato, beddesho kuna dhaqanto tilmaamaheeda ganacsi iyo warbixinaha ay cuntso iyo in ay wax siiso waxna ku qaadato magaceeda si sharciga waafaqsan.

2. In ay yeelato shaabad ku qoran magaceeda Sharciga ah, kuna dhaqanto iyadoo leh awood heshiis oo buuxda oo ku saabsan amaah qaadasho iyo bixinba. Waxay kaloo awood u leedahay in ay iibsato hanti guurta ah iyo kuwo kaleba ama ay wareejiso kuwa Wakaaladda.

3. In ay yeelato diiwaan xisaabeed oo habboon iyo in ay dejiso xeer-hoosaadyo la xiriira maamulka, toosan iyo kormeerka xisaabaha, maaliyadda iyo wax soo saarka Wakaaladda.

4. In ay magaceeda dacwad ku oogto, iyadana la dacweyn karo.

QAYBTA LABAAD

Qodobka 6aad

Xubnaha Wakaaladda

Wakaaladdu waxay yeelaneysaa Xubnaha soo socda:

- Guddiga Agaasinka;
- Guddoomiyaha;
- Maareeyaha Guud iyo
- Guddiga Maamulka.

Qodobka 7aad

Dhismaha Guddiga Agaasinka

Guddiga Agaasinku wuxuu ka koobnaan yahay Xubnaha soo socda:

1.	Guddoomiyaha Guddiga Agaasinka	Guddoomiye;
2.	Wakiil ka socda Wasaaradda Warshada iyo Ganacsiga	Xubin;
3.	Wakiil ka socda Wasaaradda Maclanta iyo Biyaha	Xubin;
4.	Wakiil ka socda Wasaaradda Maaliyadda	Xubin;
5.	Maareeyaha Guud ee Wakaaladda	Xubin-Xoghaye.

Qodobka 8aad

Xilka Guddiga Agaasinka

1. Guddiga Agaasinku waa hay'adda ugu sarreysa hoggaaminta Wakaaladda, wuxuuna qabtaa xilalka soo socda:

- Oggolaanshaha ku talo galka miisaaniyadda caadiga ah iyo xisaabxirka Wakaaladda ka hor inta aan loo gudbinin Wasiirka;
- Oggolaanshaha qorshaha iyo habraaca hawlgalka iyo qiimeynta wax soo saarka Wakaaladda;
- Dersidda warbixinnada muddada leh ee ku saabsan hoerka maaliyadda ee Wakaaladda iyo in uu tilmaan ka baxsho;
- Dejinta barnaamijka dhoofinta waxyaabaha ay Wa-

Wasiirka, maalgelinta ay Wakaaladdu sameyneyso;

— Dejinta siyaasadda shaqo siinta isagoo tixgelinaaya Sharciga, baahida iyo awoodda dhaqaale ee Wakaaladda;

— Xilalka kale ee Sharcigan gudihiisa lagu siiyey.

2. Guddiga Agaasinku wuxuu awood u leeyahay in uu Guddoomiyaha u wakiisho xil ka mid ah xilalka ku tilmaaman.

Qodobka 9aad

Shirka Guddiga Agaasinka

1. Guddigu wuxuu shirayaa ugu yaraan saddex-dii biloodba mar.

2. Guddigu wuxuu kaloo yeelan karaa shirar aan caadi ahayn.

3. Guddiga waxaa isugu yeeraya Guddoomiyaha ugu yaraan 15 maalmood ka hor taariikhda uu Shirku qabsoomayo.

4. Saddex meelood meel Xubnaha Guddigu waxa ay weydiisan karaan Guddiga Agaasinku in uu isugu yimaado shir aan caadi ahayn. Guddoomiyuhu waa in uu shirkaas qabtaa 21 maalmood gudahood laga billaabo taariikhda helitaanka codsiga.

5. Fadhiyada Guddigu waxa ay ku ansaxayaan marka ay ka soo qayb galaan aqlabiyadda Xubnuhu.

6. Qofka Guddiga Xubin ka ah oo ka tirsan Maamulka Wakaaladda xaq uma laha codbixin.

7. Go'aannadu waxa ay ku ansaxayaan cod hal dheeri Xubnaha Guddiga. Hase yeeshee haddii codadku ay isla ekaadaan waxaa la raacayaa dhinaca Guddoomiyuhu u codbixiyo. Go'aannada la gaaray waa in iyagoo qoraal ah lagu gaarsiiyaa Xubnaha 10 maalmood gudahooda laga billaabo taariikhda la guddoonsaday.

Agaasinka oo leh xaq codbixin oo Guddigu iska dhex doorto.

Qodobka 10aad

Guddoomiyaha

Guddoomiyaha Guddiga Agaasinka waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne, iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka, wuxuuna qabanayaa xilalka soo socda:

1. Isugu yeeridda iyo guddoominta shirarka Guddiga Agaasinka;

2. Masalaadda Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga;

3. Masalaadda Wakaaladda dhinacyada saddexaad;

4. La socodka iyo hubinta xaqiijinta himilooyinka Wakaaladda, go'aannada Guddiga Agaasinka iyo habsami u socodka hawlgalka Wakaaladda;

5. Hawlaha kale ee Guddiga Agaasinku u xilsaaro.

Qodobka 11aad

Maareeyaha Guud

1. Maareeyaha Guud waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne, iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka.

2. Maareeyaha Guud waa Madaxa fulinta hawlaha Wakaaladda wuxuuna masuul ka yahay maamulkeeda iyo arrimaha hawlmaalmeedkeeda isagoo raacaya Sharciga, go'aannada Guddiga Agaasinka iyo tilmaanta Wasiirka. Gaar ahaan wuxuu qabtaa xilalka soo socda;

— Xaqiijinta himilooyinka Wakaaladda iyo hoggaaminta hawlaheeda;
— Horumarinta wax soo saarka iyo kormeerka tayada tacabka;
— Horumarinta ganacsiga [illegible]

— Dejinta hab qaybin shamiinso oo habboon;
— Soo hordhigga Guddiga Agaasinka miisaaniyadda ku talo galka iyo midda xisaabxirka;
— Hayinta buugagga xisaabaha ee Wakaaladda;
— Hawlgelinta, maamulka iyo qiimeynta Shaqaalaha Wakaaladda.

Qodobka 12aad

Guddiga Maamulka

Guddiga Maamulku wuxuu ka kooban yahay Xubnaha soo socda:

— Maareeyaha Guud;
— Maareeyaha Warshadda iyo
— Maareeyaha Lacagta iyo Maamulka.

Qodobka 13aad

Xilka Guddiga Maamulka

Guddiga Maamulku wuxuu xaq u leeyahay Maareeyaha Guud amarmaha soo socda:

— Dejinta habraaca iyo qorshaha arrimaha la xiriira farsamada, maaliyadda iyo maamulka ee Wakaaladda;
— Diyaarinta miisaaniyadda ku talo galka iyo xisaabxirka;
— Dejinta qorshaha hawlaha Wakaaladda iyo qiimeyntooda;
— Diyaarinta warbixinta muddada leh ee loo gudbinaayo Guddiga Agaasinka, kuna saabsan maaliyadda Wakaaladda;
— Dejinta qorshaha horumarinta wax soo saarka;
— Dejinta habaabka laga maalyo laguna kormeero xisaabaha Wakaaladda iyo sicirka;
— Dersidda talooyinka la xiriira shaqo qorista iyo mushaarka shaqaalaha ee la hor dhigaayo Guddiga Agaasinka;
— Dersidda talooyinka ku saabsan ku talo galka hantida iyo maalgelinta Wakaaladda ee la hor dhigaa-

QAYBTA SADDEXAAD

HANTIDA

Qodobka 14aad

Rasumaalka Wakaaladda

Rasumaalka Wakaaladdu waxa uu ka kooban yahay:

1. Lacagta ay Dawladdu u qoondeysay in lagu wado hawlaha Wakaaladda iyo mashaariicdeeda.

2. Hantida guurtada ah iyo midda maguurtada ah ee Wakaaladda.

3. Dakhliga ka soo gala Wakaaladda hawlaheeda, barnaamijyadeeda, mashaariicdeeda iyo adeegyada ay qabato;

4. Deymanka Wakaaladdu ay qaadato.

5. Deeqaha iyo kaalmada Wakaaladdu ay ka hesho Dalka gudihiisa ama dibeddiisa.

Qodobka 15aad

Xisaabaha Wakaaladda

Wakaaladdu waxay ka furaneysaa Bankiyada xisaab ayadoo si cad u qeexeysa dhaqdhaqaaqa iyo habka socodsiinta xisaabaha. Wakaaladdu waxay kontorooleysaa xisaabahaasi iyadoo sugeysa in maalliyadda Wakaaladda loo isticmaalay danaha Wakaaladda keliya iyo in mar walba buugagta xisaabaha si habboon looga shaqeeyo laguna socodsiiyey xisaabaha.

Qodobka 16aad

Miisaaniyadda

1. Wakaaladdu waxay yeelaneysaa miisaaniyad u gaar ah. Sannad miisaaniyadeedka Wakaaladdu wuxuu billaabanayaa 1da Jennaayo, wuxuuna dhammaanayaa 31ka Disember ee sannad walba.

2. Inta ka horreysa 1da Oktoobar Maareeyaha

Guddiga Agaasinka.

3. Guddiga Agaasinku wuxuu go'aan ka gaarayaa miisaaniyadda la soo hordhigay inta ka horreysa 15 Noofember.

4. Faa'iidooyinka saafiga ah oo ay Wakaaladdu hesho waxaa lagu qaybinayaa go'aan ka soo baxa Guddiga Agaasinka.

Qodobka 17aad

Xisaabxirka

1. Sannad kasta, ka horreysa 1da Abriile, Maareeyaha Guud wuxuu sameynayaa xisaabxirka miisaaniyadda sannadkii la soo dhaafay wuxuuna u gudbinayaa Guddiga Agaasinka.

2. Isla markaas Maareeyaha Guud wuxuu nuqul xisaab xirka ah u gudbinayaa Guddiga Hantidhowrka ee Wakaaladda.

3. Guddiga Hantidhowrku wuxuu xisaabxirka soo raacinayaa warbixin tifaftiran oo ku saabsan habsamida loo maamulay dakhliga iyo kharajka.

4. Haddii Guddiga Hantidhowrku uu isku khilaafo warbixinta, hantidhowre kasta wuxuu diyaarinayaa warbixin u gaar ah, warbixinnada oo idilna waxaa la hor dhigayaa Guddiga Agaasinka.

5. Guddiga Agaasinku, isagoo dhegestay warbixinnada hantidhowrka, wuxuu oggolaanayaa xisaabxirka.

Qodobka 18aad

Guddiga Hantidhowrka

1. Wakaaladdu waxay yeelaneysaa Guddi Hantidhowr ah oo ka kooban Guddoomiye iyo laba xubnood.

2. Hantidhowrayaashu waa in ay ahaadaan khubaro ku xeel dheer xisaabaadka iyo maamulka waxaana magacaabaya Guddiga Agaasinka isagoo dhegeystay soo jeedinta Guddoomiyaha.

3. Xubnaha Guddiga Agaasinku kama mid noqon akraan Hantidhawrayaasha Wakaaladda.

4. Muddada xilka ee xubnaha Guddiga Hantidhawrka waa laba sano, dibna waa loo magacaabi karaa.

5. Hantidhawrayaashu waxay yeelanayaan gunno, waxaana qiimaheeda xaddidaya Guddiga Agaasinka.

Qodobka 19aad

Awoodda Hanti-dhawrka

1. Guddoomiyaha iyo xubnaha kale ee Guddiga Hantidhawrka waxay aood u leeyihiin, wadajir ahaan iyo mid midba, in ay daalacdaan diiwaannada xisaabaha Wakaaladda iyo qoraallada kale ee xisaabaha khuseeya.

2. Waxay kaloo awood u leeyihiin in ay weydiistaan caddeynta iyo wargelinta ay lagama maarmaan u arkaan.

3. Maamulka Wakaaladdu waa in uu u suurta geliyaa Hantidhawrayaasha gudashada xilkooda.

QEYBTA AFARAAD

QODOBBO GEBA-GEBO AH

Qodobka 20aad

Degaanka Warshadda

1. Dhulka Warshadda: waxaa Wakaaladda loogu deeqay dhulka ay ka dhiseyso Warshadda iyo guryaha Shaqaalaha.

2. Dhulka kaawooyinka: waxaa Wakaaladda loogu deeqay kaawooyinka laga qaadayo alaabta

3. Hawlaha adeegga: waxaa Wakaaladda loo oggolaaday in ay ka faa'iideysato dekadaha, jidadka iyo isgaarsiinta Qaranka iyadoo ugu isticmaaleysa danta hawlaheeda gaarka ah.

Qodobka 21aad

Haqabtirka Warshadda

Iyadoo u hoggaansameysa shuruucda iyo xeerarka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaa Wakaaladda loo oggolaaday:

1. In ay u madax bannaanaato doorashada dhinacyada ay la geleyso heshiisyada gaacsi ee loogu keenayo makiinadaha, qalabka iyo alaabooyinka lagu socodsiiyo Warshadda Shamiintada.

2. In ay dibadda ka keensato dhammaan qalabka, makiinadaha, sheykabaalka iyo badeecooyinka farsameysan oo ay Wakaaladdu u baahan tahay.

3. Inay u madax bannaanaato dhaqdhaqaaqa qalabka iyo makiinadaha kor lagu xusay, Dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba.

Qodobka 22aad

Dhaqdhaqaaqa hantida guurtada ah

1. Wakaaladdu waxay awood u leedahay bixinta lacagaha ay ku yeeshaan mucaamishooda, sharikadaha wax rara, shaqaalaha shisheeye ee Wakaaladda u shaqeeyo iyo guud ahaan lacagaha lagu yeesho (gaar ahaan dib u bixinta dulsaarka amaahda, celinta amaahda kor ku xusan, bixinta kharajyada kaalmada farsamada). Sidoo kale Wakaaladdu waxay u madax bannaan tahay guddoonka lacagta soo geleysa ayadoo u hoggaansameysa sharciyada Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

2. Iyadoo lagu shaqaynayo Sharciyada u degsan ganacsiga dibedda iyo sarrifka lacagta adag, Wakaaladda waxaa awood loo siiyey in ay ka faa'iideysato heerka sarrifka ee u faa'iido roon, si ay:

— U bixiso qiimaha qalabka, alaabta, adeegga iyo khid madaha rakibaadda qalabka.

Qodobka 23aad
Cashuur dhaafid

Wakaaladda waxaa laga dhaafayaa dhammaan cashuuraha Dawladda Dhexe oo ay ku jiraan cashuuraha furdooyinka ilaa muddo toddoba sano ah.

Qodobka 24aad

Habka ku meelgaarka ah ee soo dejinta qalabka

Waxay Wakaaladdu ka faa'iideysanaysaa habka ku meel gaarka ah ee soo dejinta qalabka iyo makiinadaha marka ay heshiis la gasho sharikado shaqo u qabanaya kaddibna la noqonaya qalabkooda ay ku shaqeeyeen.

Qodobka 25aad
Sicirka shamiintada

1. Sicirka shamiintada lagu suuq geynayo waxaa dejinaya Guddiga Agaasinka, ayadoo tixgelin la siinayo in ay Wakaaladdu hesho faa'iido caadi ah oo ka dhalata raasalmeelkeeda.

2. Wixii kharaj ku kordha tacab soo saarka Wakaaladda waxaa lagu kordhinayaa sicirka shamiintada, ayadoo la tixgelinaayo taabagalka dhaqaalaha Wakaaladda.

3. Marka ay Wakaaladdu daboosho baahida suuqa gudaha ee shamiitada tiro iyo tayaba, waxaa reeban in shamiinto dibedda laga keeno.

Qodobka 26aad
Xeer-nidaamiye

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya, isagoo dhegeystay soojeedinta Wasiirka, wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye dhammeystiraya, nidaaminayana habsami u fulinta Sharcigan.

Qodobka 27aad

Burrin

Waxaa la burriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qodobka 28aad

Dhaqangal

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Dec. 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharciga lambar 2, taariikh 1 Jen. 1986: Oggolaanshaha Miisaaniyadda Ku talo galka Dawladda ee Sannadka 1986.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Dawladda waxaa awood loo siiyey in ay soo uruuriso dakhliga iyo in ay bixiso kharajka ku qoran Miisaaniyadda halkan ku lifaaqan ayadoo la raacayo Xeerka, habka iyo nidaamka u degsan Maamulka Xisaabaadka iyo Hantida Dawladda.

Qod. 2aad

1. Isbeddelka guud ee miisaaniyadda iyo kuwa ku saabsan MADAXYADA MISAANIYADDA waxaa lagu soo saarayaa Sharci.

2. Kala wareejinta ku saabsan Madax-xigeennada isku madax ah waxaa awood loo siiyey Dawladda.

3. Kala wareejinta ku saabsan xarfaha hoos yimaada madax-xige waliba waxaa awood loo siiyey Wasiirka Wasaarad waliba. Kala wareejinta ceynkan oo kale ee miisaaniyadda Dawladda Hoose waxaa awood loo siiyey Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Gobol waliba.

Qod. 3aad

1. Miisaaniyadda loogu talo galay Mashruucyada horumarineed iyo fulinta Qorshaha Qaranka waxaa loogu isticmaali karaa oo keliya mashruuc horumarineed.

2. Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu wuxuu awood u leeyahay in uu keyd ka dhigo, haddii loo baa-

madax-xige waliba ee miisaaniyadda isagoo raacaya Sharciga.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Jennaayo 1986 waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1 Jan. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maslax Maxamed Siyaad uu ku soo weydiistey arrigа taariikhdiisu aheyd 20.2.84 gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal degmada Liido qaabkiisuna yahay Rect. addimmisu yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/= mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 60

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 57

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam. 61

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga bilaabo maalintii lagu soo daabaco buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 6 Mag. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 1

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O D H Ú L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Saciid eXrsi uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho Maalintii taariikhdu ahayd 20.2.1984, uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Cabdulcasiis qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 62

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 59

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/oose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 6 Mag. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 2

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Maxamed Siyaad uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho Maalintii taariikhdu ahayd 20.2.1984, uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Cabdulcasiis, qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 57

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 56

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 60

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/oose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 6 Mag. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 3

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Kaasha Maxamed Kaatun uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho Maalintii taariikhdu ahayd 22.12.84, uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 27X13,50 kuna fadhiya 364,50/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid Yar

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo „

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Guriga Cabdisalaam.

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/oose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 12 Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 4

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ismaaciil Saciid Cosoble uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho Maalintii taariikh du ahayd 26.12.83 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wadajir qaabkiisuna yahay Afar Gees Isle'eg, Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya 400/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 2265

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 1489

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/oose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 12 Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 5

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Yuusuf Cismaan Culusow uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho Maalintii taariikh du ahayd 20.1.82, uu ku soo weydiistay gabal dhul Daw ladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Cabdulcasiis qaabkiisuna yahay Trapezio Addimihiisuna yihiin (15+6).40 kuna fadhiya 420/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Guriga Sheekh C/dulle

Galbeed waxaa ka xiga: dhulkiisii hore

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/oose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 12 Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 6

Doladda Hoose Ee Muqdisho
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Xaawo Maxamed Warsame uu soo weydiistay k

Warsame uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho Maalintii taariikhdu ahayd 25.1.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Hodon qaabkiisuna yahay Rettangoolare Addimihiisuna yihiin 27x13 kuna fadhiya 351 M.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi waxaa ka xiga: Nuur Caloolo iyo G. kale

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1p Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. HOOSE
Maxamud Ca'bdi Cismaan.
Doladda Hoose Ee Muqdisho

I. 7

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Maxamud X. Muuse uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd j.2.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Cabdulcasiis qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20x30 kuna fadhiya 600 Mdh.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galb d Waxaa ka xiga: Waddo

B a d i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1p Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. HOOSE

Maxamud Ca'bdi Cismaan.

L. 8

Doladda Hoose Ee Muqdisho

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaale Roobie Xasan Maxamed uu soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 28.1.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Yaaq Shiid qaabkiisuna yahay Afar Ges islaeg Addimihiisuna yihiin 20x20 kuna fadhiya 400 Mdh

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul dad

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: W. Jubada Sare

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul dad leh

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1p Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. HOOSE

Maxamud Cabdi Cismaan.

L. 9

Doladda Hoose Ee Muqdisho

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Seynab X. Cilmi uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdinso maalintii taariikhdu ahayd 24.4.84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wardhiigley qaabkiisuna yahay Trebesiyo Addimihiisuna yihiin (19.80 19,80)x19,80 kuna fadhiya 392.04. Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Wadada C. Qalabka Sida

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul dad

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1p Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. HOOSE

Maxamud Cabdi Cismaan.

L. 10

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

Doladda Hoose Ee Muqdisho

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cadde Suufi Maxamed uu soo qortay Arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee L/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 13,3,84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan qaabkiisuna yahay Rettangolo Addimihiisuna yihiin 12x12 kuna falhiya 144 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri dad

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Guri dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. HOOSE

Maxamud Ca'bdi Cismaan.

L. 11

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shirkadda Dhisma ha Xamar uu soo qortay Arji waaxda dhulka rasmiga ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 17,7,83 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wardhiigley qaabkiisuna yahay Afar Gees Aldimjhiisuna yihiin 100x100 kuna fadhiya 10.000 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 25-27 W.

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 24/W.

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkj karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhulka rasmi ga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta la gu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Hasmiga ah.

Muqdisho, 12 Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. Hoose

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 12

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulaahi Geelaale Warsame uu soo qortay Arji waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 3.1.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir qaabkiisuna yahay Afar Gees islaeg Addimihiisuna yihiin 20x20 kuna fadhiya 400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 679 B.

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 676 B.

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhulka rasmi ga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta la gu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Hasmiga ah.

Muqdisho, 12 Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. Hoose
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 13

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية

الجريدة

Sannadka 14aad Muqdisho 25ka Jannaayo 1986 L. 1 R1

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFINTA RASMIGA AH

جريدة رسمية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaankii F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaankii waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 3 ee Jen. 1986, Wax ka beddelid da Sharciga Qareennada Bog; 32

QAYBTA LABAAD

XEER

W. M.

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

QAYBTA SADDEXAAD

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 15.12.85, Lumid Jeeg. War. L. 137714 ku qoran Axmed Macallin Maxamuud L. 15 » 34

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 15.12.85, Cabdullaahi Seed Maxamuud L. 14

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 1.1.85, Lumid Buug-Kayd L. 265 ku qoran Salaad Cumar Xasan L. 16 » 36

MAXKAMADDA DEG/DA BERBERA, 29.10.85 Lumid Jeeg War. L. 608412 ku qoran Aadan Xasan Cilmi L. 17 » 37

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25.12.85, Lumid Buug Kayd L. 8067 ku qoran Rashiid Isaaq Diini L. 18 » 38

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.12.85, Lumid Jeeg War. L. 0284583 ku qoran Maxamed Axmed Maxamed L. 19 » 39

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.12.85, Lumid Jeeg War. L. 0284582 ku qoran Maxamed Axmed Maxamed L. 20 » 40

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 31.12.85, Lumid Buug Kayd L. 913 ku qoran Cabdikariin Maxamed Cawad L. 21 » 41

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 31.12.85, Lumid Jeeg War. L. 181021 ku qoran Maxamed Aadan Faniin L. 22 » 42

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 8.1.86, Lumid Jeeg War. L. 196769 ku qoran Maxamuud Cali Dukaan L. 23 » 43

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 6.1.86, Lumid Jeeg War. L. 0488701 ku qoran Cilmi Faarax Idiriis L. 24 » 44

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 6.1.86, Lumid Jeeg War. L. 566334 ku qoran Cilmi Faarax Idiriis L. 25 » 45

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 16.9.85, Lumid Jeeg War. L. 0181991 ku qoran Maxamuud Abokor Xirsi L. 26 » 46

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 20-11-85, Lumid Jeeg War. L. 0149207 ku qoran Cabdi Axmed Jaamac L. 27 » 47

WARSHADDA SAABUUNTA QUBEYSKA IYO MARISKA, Ogeysiis Shir Saamiley L. 28 » 48

WARSHADDA KIIMIKADA SOOMAALIYEED (BAYL), Ogeysiis Shir Saamiley L. 29 » 49

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 3, taariikh 13 Jan. 1986: Wax ka beddelidda Sharciga Qareennada.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Mihnadda Qareennimada Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa la madax banneeyey waxaana la 'baabi'iyey Iskaashataada Qareennada.

Qod. 2aad

Faqradda 2aad, Qod. 6aad Sharciga lambar 85 ee 21.10.1975 waxaa loo beddelay sida soo socota:

« 2. Garsoorayaasha, Barayaasha Kulliyadda Sharciga ee Jamhuuriyadda iyo Hawlwadeennada Qareennimo ugu shaqeeyey Dawladda iyo Hay'adaheeda muddo aan ka yareyn 5 sannadood, haystana Shahaaddada Jaamacadda ee lagu sheegay xarafka (j), faqradda 1aad ee Qodobkan, waa laga dhaafayaa imtixaanka ku sheegan faqradda hore, xarafkeeda (x)».

Qod. 3aad

Faqradda 2aad, Qodobka 7aad, Sharciga lambar 85 ee 21.10.1975 waxaa loo beddelay sida soo socota:

« 2. Sharciyaqaanka loo oggolaaday Qareennimada waxaa lagu qorayaa Diiwaanka Qareennada marka uu baxsho ujuurrada gelitaanka Qareennimada oo dhan Sh So. 5.000/=».

Qod. 4aad

Qaybta saddexaad, Sharciga lambar 85 ee 21.10.1975, [illegible] Asluubta ee ku tilmaaman waxaa qaadaya

Guddiga Talo-bixinta iyo Diiwaangelinta Qareennadda oo go'aankoodu kama dambeys yahay.

Qod. 5aad

Qodobka 5aad ee Sharciga lambar 85 ee 21.10.1975, xarafkiisa (x) waxaa loo beddelay sida soo socota:

« (x) Qareen uu ka dhex magacaabo Qareennada Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diintu, sannad walba».

Qod. 6aad

1. Xadka ugu sarreeya ee Xushmada Qareennada waxaa lagu xaddidayaa Xeer Madaxweyne, iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

2. Inta laga soo saarayo Xeerka kor ku tilmaaman, waxaa lagu dhaqmayaa tacriifada ku qoran warqado tilmaameedka lambar 1, 2, 3, 4 iyo 5 ee ku lifaaqan Sharciga Qareennada.

Qod. 7aad

1. Waxaa la tirtiray Qodobbada 1 iyo 16 ee Sharciga lambar 85 ee 21.10.1975 iyo dhammaan lifaaqyada Sharcigaas oo ku saabsan Hawlaha Iskaashatada Qareennada.

2. Waxaa kaloo la tirtiray meel kasta oo Sharciga kor ku tilmaaman gudihiisa ku qoran yahay ereyga ISKAASHATADA.

Qod. 8aad

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13 Jan. 1986

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeegga War. Lam. 137714 lagana sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Badhaadhe kuna jirto lacag dhan sh.so. 750 kuna qoran magaca Cab dulaahi Seed Maxamuud sidaa ku cad warqadda Lam. 10655 tr. 11.12.85 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis. Guud

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Lam. 137714 lagana sameeyay Laanta Badhaadhe ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed ayna ku jirto lacag dhan sh.so. 750 kuna qoran magaca Cabdulaahi Seed Max/ud

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Badhaadhe ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in uu siiyo J/le Cabdulaahi Seed Maxamuud lacagta cadadkeedu yahay sh.so. 750 ee ku qornayd Jeegga War. ee kor ku tilmaaman markay ka soo waree to muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Gofaanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee J.D.S. ee Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.12.85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shangolle

L. 14

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In BuugKeyd dhumay uu lambar kiisu ahaa 265 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 4aad kuna qoran Lacag dhan sh.so. 25.552 uu iska lahaa Salaad Cumar Xasan sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay —— taariikhdeeduna tahay 31,12,85 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Afaraad

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9,9,85

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 265 ee ku qoran Salaad Cumar Xasan ayna ku jirto sh.so 25.552.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka Laanta Afaraad ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 30 maalmood maa linta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 1,1,8

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBLKA BANAADIR

Dr. Cabdi Salaad Shangolle

L. 16

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeegga War. Lam. 260455 lagana sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Badhaadhe kuna jirto lacag dhan sh,so, 12.500 kuna qoran magaca Axmed Macallin Maxamuud sidaa ku cad warqadda Lam. 10655 tr. 11,12,85 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis. Guud

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9,9,1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Lam. 260455 lagana sameeyay Laanta Badhaadhe ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka ayna ku jirto lacag dhan sh,so, 12.500 kuna qoran magaca Axmed Macallin Maxamuud.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Badhaadhe ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in uu siiyo J/le Axmed Macallin Maxamuud lacagta cadadkeedu yahay sh,so, 12.500 ee ku qorna yd Jeega War. ee kor ku tilmaaman markay ka soo waregto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 15.12.85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdi Salaad Shangolle

L. 15

MAXKAMADDA GOB/DEGMADA BERBERA

KU: Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Waladda Muqdi.
Og: Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Berbera
Og: Aadan Xasan Cali L.M. Deg. Berbera

Ujeeddo Lumid Jeega Lr. 608412 kuna qorantahay Lacag dhan sh,so, 10.000

MARKUU ARKAY: Arrigа uu soo qortay J/le Aadan Xasan Cilmi ku taariikhaysan 27,7,85 ee uu ku cada ynayay in loo caddeyo lumidda Jeegga kor ku qoran

MARKUU ARKAY: Taarka Baafinta ah ee la qoray 16,3,85, kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Berbera ee lagu baafiyey qaybta kale Lumdasta Jeeggaasi.

MARKUU ARKAY: Qod. 69 L, 9,9,65 L. 2 waxaa Caddaatay in Jeegga War. Lr. yahay 608412 Lacagtiisuna tahay 10.000 sh,so, uu lumay taariikh markii ay ahayd 1 ,3,85, ayna ku qorantaha Lacagtaasi kor ku qoran

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo markale Jeegga kor ku qoran Muddo 30 Cisho gudahood ah ka dib markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, Haddaan lahayn qof sheegta., waa in Gacanta laga saaraa Ninka layiraa hdo, Aadan Xasan Cilmi amase qof ka wata awood shar ci ah, 30 Beri waa in lasugo.

Berbera, 29.10.85

GUDDOOMIYAHA MAX/DA GOB. DEG. BERBERA
(Dr. Shawqi Cilmi Cali)

L. 17

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: CODSIGA DUSHA KU QORAN:

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Keyd Lam. 8067 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad kuna jirto Lacag dhan sh,so, 28.578,33 kuna qoran magaca Ra shiid Isaaq Diini sidda ku cad warqadda lam. 3489 Tr. 24,12,85 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga & Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9,9,1962.

WUXUU XEERIYEY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Buuga Lam. 8067 lagana sameeyey Laanta 1aad ee Ban kiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Rashiid Isaaq Diini ayna ku jirto lacag dhan sh,so, 28.578,33

WAXAA LA FASAXAA

Laanta 1aad ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soo maaliyeed in uu siiyo J/le Rashiid Isaaq Diini Lacagta cadadkeedu yahay sh,so, 28.578,33 ee ku qoran Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman kadib markay ka soo war eegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood, laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 25,12,85
GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 18

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: CODSIGA DUSHA KU QORAN:

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeegga War. Lam. 0284583 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Sadx/d ku jirto Lacag dhan sh,so, 100.000 kuna qoran magaca Maxamed Axmed Maxamed sida ku cad warqadda Lam. 726 tr. 29,12,85 ka soo baxday Laanta Sadx/d Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9,9,1962.

WUXUU XEERIYEY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0284583 lagana sameeyey Laanta Sadxad ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Maxamed Axmed Maxamed ayna ku jirto lacag dhan sh,so, 100.000

WAXAA LA FARAYAA

Laanta Sadexaad ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed in uu siiyo J/le Maxamed Axmed Max/d Lacagta cadadkeedu yahay sh,so. 100.000 oo ku qoran Jeegga War. ee kor ku tilmaaman, ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax ishor taag ah laga keenin.—

Muqdisho, 30,12.85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 19

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: CODSIGA DUSHA KU QORAN:

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeegga War. Lam. 0284582 lagana sameeyey Bankiga Ganasiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Sadaxaad kuna jirto lacag dhan sh,so, 100.000 kuna qoran magaca Maxamed Axmed Maxamed sidda ku cad warqadda Lam. 762 Tr. 29,12,85, ka soo baxday Laanta Sadx/d ee Bankiga Ganacsiga & Keydka Soomaaliyeed.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9,9,1962.

WUXUU XEERIYEY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0284582 lagana sameeyey Laanta Sadax/d ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Maxamed Axmed Maxamed kuna jirto lacag dhan sh,so, 100.000

WAXAA LA FARAYAA

Laanta Sadexaad ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed in uu siiyo J/le Maxamed Axmed Max/d Lacagta cadadkeedu yahay sh,so. 100.000 oo ku qoran Jeegga War. ee kor ku tilmaaman, ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax ishor taag ah laga keenin.—

Muqdisho, 30,12.85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 20

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: CODSIGA DUSHA KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd dhumay uu lambar kiisu ahaa 913 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga & Keydka Soomaaliyeed Laanta W/dhiigley kuna qoran lacag dhan sh,so, 2.866,66 uu iska lahaa Cabdi Xakiin sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000542 taariikhdeeduna tahay 22,12,85 ee Bankiga Ganacsiga & Keydka Soomaaliyeed Laanta W/dhii.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9,9,85

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 913 ee ku qoran Cabdi Xakiin Maxamed Cawd ayna ku jirto sh,so, 2.866,66

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga & Keydka Laanta W/dhigley ee kor ku tilmaaman una sameeyso mid la mid ah mar key ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 31,12,85
GARSOORAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shangolo

L. 21

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay uu lambarkiisu ahaa 181021 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis. Guud kuna qoran lacag dhan sh,so, 100.000 uu iska lahaa Maxamed Aadan Faniin sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 10334 taariikhdeeduna tahay 31,12,85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis. Guud

HADUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9,9,85,

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Lam. 181021 ee ku qoran Maxamed Aadan Faniin ayna ku jirto sh,so 100.000

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka Laanta Boosaaso ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 31,13,85

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANADIR
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 22

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay uu lambarkiisu ahaa 196769 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qo ran lacag dhan sh.so. 100.000 uu iska lahaa Maxamuud Cali Daahir sida ku cad warqadda lambarkeedu ya hay 40058 taariikhdeeduna tahay 8,1,86 ee Bankiga Ganacsiga & Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9,9,85

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lambar. 196769 ee ku qoran Maxamuud Calj Dukaan ayna ku jir to sh,so, 100.000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah mar-ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 8,1,86

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANADIR
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 23

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay uu lambarkiisu ahaa 0488701 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Afraad kuna qoran lacag dhan sh,so, 100.000 uu iska lahaa Cilmi Faarax Idiriis sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 081 taariikhdeeduna tahay 6,1,86 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Afraad

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9,9,85

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lambar. 0488701 ee ku qoran Cilmi Faarax Idiriis ayna ku jirto sh,so, 100.000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Afraad ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah marka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii jnta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 6,1,86

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANADIR
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 24

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay uu lambarkiisu ahaa 566334 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Afraad kuna qora lacag dhan sh.so. 10.000 uu iska lahaa Cilmi Faarax Idiriis sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 081 taariikhdeeduna tahay 6.1.86 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Afraad

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.85

WUXUU FARAYAA

In la baa'bi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lambar. 566334 ee ku qoran Cilmi Faarax Idiriis ayna ku jirto sh.so, 10.000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Afraad ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah marka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 6.1.86

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANADIR
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 25

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

MGT 14785 Tr· 16·9,85,

KU: Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda X/ar

UJ: Baafin Jeega W/Lumay Lam. Yahay 0181991

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin J/W ee Lam. yahay 0181991.

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Burco·

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65, Lumid JeeggaWareega ee Lam. yahay 0181991 kuna qorayd sh,so, 38.580 Lagana sameeyey Laanta Burco, kuna qoran yahay J/le Maxamuud Abokor Xirsi·

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeega kor ku xusan Jaalle Maxamuud Abokor Xirsi, markii ay ka soo wareegto 20, Casho, laguna sharciyeeyo X· Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.—

Waxaa Laga Codsanayaa

In Jeega cusub ee la samayn doono Gacanta laga saaro J/le Maxamuud Abokor Xirsi, iyadoo la sugayo muddada kor ku Xusan.

Jaamac Cabdullaahi Bille Kaaliyaha

MAXKAMADDA GOB. TOGDHEER BURCO

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G· TODHEER B/co

(Dr· Maxamed Xaaji Cabdulqaadir)

L. 26

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

MGT/190/85 Burco 20,11,85

Ku: Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Daw/da Xamar
UJ: Baafin Jeega Wareega Lam. 0149207

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta Jeega Lumay

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Burco

HADDUU ARKAY: Qod· 69,65 Lumid Jeegaga War· ee Lam. 0149207 sh,so, 50.000 kuna qoran yahay Cabdi Axmed Jaamac, uuna ka lumay Jaamac X. Aadan Faarax

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeega War· J/le Jaamac X. Aadan Faarax markii ay ka soo wareegto 20 Casho gu dohood laguna shaaciyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.—

Waxaa Laga Codsanayaa

In Jeegaas Cusub oo la sameyn doono Gacanta laga saaro J/le Jaamac X· Aadan Faarax iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan·

Jaamac Cabdullaahi Bille Kaaliyaha
MAXKAMADDA GOB. TOGDHEER BURCO

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G· TODHEER B/co
Dr. Abuukar Isllaw Cumar

L. 27

OGEYSIIS SHIR SAAMILEY

WARSHADDA SAABUUNTA QUBEYSKA & MARISKA

Waxaa dhammaan laysagu yeerayaa Saamileyda Shirkadda Warshadda Saabuunta Qubeyska & Mariska inay ka soo qayb galaan shirka Saamileyda caadiga ah ee lagu qaban doono Xarunta Shirkadda ee Xamar saacaddu markay tahay 17'00 ama shanta Galabnimo, Bisha Febbraayo 20keeda 1986, hadduu shirku dhammaan waayana mar labaad bisha Febbraayo 27keeda 1986, isku saacadda kor ku qoran.

Saamileydaa Shirkadda waxaa laga codsanayaa inay shan maalmood ka hor keenaan saamiyaasha ku qoran, Saldhigga Shirkadda ilaa & intii uu shirku ka dhammaado.

ARRIMAHA DOODDA:

1) Oggolaanshaha dheellitirka Xisaabaadkii Sannadkii 85.

2) Wixii kale ee soo raaca ama door la bido in laga doodo.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 28

OGEYSIIS SHIR SAAMILEY

WARSHADDA KIIMIKADA SOOMAALIYED (BAYL

Waxaa dhammaan laysagu yeerayaa Saamileyda Shirkadda Warshadda Kiimikada Soomaaliyeed (Bayl) inay ka soo qayb galaan shirka Saamileyda caadiga ah ee lagu qaban doono Xarunta Shirkadda ee Xamar Saa caddu markay tahay 17'00 ama shanta Galabnimo, Bisha Febraayo 15keeda 1986, hadduu shirku dhammaan waayana mar labaadka Bisha Febraayo 22keeda 1986, isku Saacadda kor ku qoran.

Saamileyda Shirkadda waxaa laga codsanayaa inay shan maalmood ka hor keenaan Saamiyaasha ku qoran Saldhigga Shirkadda ilaa & intii uu shirku ka dhammaado.

ARRIMAHA DOODDA:

1) Oggolaanshaha dheellitirka Xisaabaadkii Sannadkii 85.

2) Kordhinta Raasumaalka Shirkadda.

3) Wixii kale ee soo raaca ama door la bido in laga doodo.—

GUDDIGA MAAMULKA

L. 29

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA
TIRSI/MGH/27/85

UJEEDDO: Digireeto Cusbooneysiin Jeegga Wareega ee Lumay lambar yahay 0454711, ee taariikhdiisu tahay 24.9.85 ee Lacagtiisu dhan tahay 100,000/= Shilin kuna qoraa Xasan Caydiid.

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cabdillaahi Axmed Xirsi ee ku taariikheysan 12.12.85, uuna ku Codsanaayo in loo Cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee lumay ee kor ku qroan;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, Lambarkeeduna yahay 1700 ee taariikhdeedu tahay 16.12.85, laguna soo Caddeeyey in laga sameeyey Jeeggaas Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, loona sameeyey Xasan Caydiid, lacagtiisuna dhan tahay 100,000/= Shillin taariikhdiisu tahay 24.9.85;

MARKUU ARKAY: Qodobbada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal Gareeyo Jeegga Wareega ee lumay Lambarkiisa iyo taariikhdiisa iyo Lacagtiisuba kor ku qoran yihiin, loona Cusboonaysiiyo Jaallaha Magaciisa yahay CABDILLAAHI AXMED XIRSI, Cusboonaysiintana Gacanta laga saaro Jaallahaas Magaciisa kor ku qoran yahay ama Ciddii Awood ka haysata Muddo 15 Maalmood Gudahood ah ka dib Maalinta Go'aan laga soo saaro Faafinta Rasmig ah ee Laanta Madaxtooyada J.D. Soomaaliyeed.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa. in lagu dheliyo Nuqulka Go'aankan Bangiga Irdihiisa si Ciddii haysata Jeeggaas Wareega ee lumay ee kor lagu kansal Gareeyey uga soo qortaan Cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 22.12.85

GUDDOOMIYAHA MAX. G. W/G. HARGEYSA
(Ibraahin Faarax Maxamed)

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسميـــة الجريـــدة

Sannadka 14aad Muqdisho 1da Feberaayo 1986 L. 2

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة رسمية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 4 ee 13 Jen. 1986, Oggolaansho Meel-marin Heshiis damaanadeed oo Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed iyo Bankiga Horumarinta Islaamka. Bog; 56

SHARCI L. 5 ee 13 Jen. 1986, Oggolaansho Xisaab-Xirka Miisaaniyadda 1984. » 57

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 1 ee 12 Jen. 1986, Meel-marin Heshiiska oo dhexmaray Bankiga Horu/ta Soomaayeed iyo Bankiga Horu/ta Islaamka. » 60

DECREE ; 1 on 12 Jan. 1986, Instrument of ratification. » 6

XEER DAWLADDA HOOSE MUQ. L. 1 ee 26 Agos. 1985, Cad dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho, KM. 12, Maddada Afgooye. » 62

QAYBTA SAD/XAAD

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Rashiid Aadan, Maxamed Axmed, Maxamuud Cabdi, Cabdullaahi Cali Faarax, Maxamed Abuukar M. ay u soo qorteen arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 10.5.84 ay ku weydiisteen gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Waddada ——————— qaabkiisu yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 150X300 kuna fadhiya mq. 45.000.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Koofur waxaa ka xiga: Waddada Jesiira

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

Bari waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/H. Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 15 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 591

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Faaduma Maxamed Geeseey ay u soo qoratay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 30.12.84, ay ku weydiisatay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Waddada ———— qaabkiisu yahay Rettangolar adimihiisuna yihiin 20X40 kuna fadhiya mq. 800.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa kak xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lambar 433-434

Bari waxaa ka xiga: Dhul Lambar 437-438

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 15 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 592

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Walaalaha Shaamoo ay u soo qorteen arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 19.11.84 ay ku weydiisteen gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Waddada — ——— qaabkiisu yahay Rettangolar addimihiisuna yihiin 150X100 kuna fadhiya mq. 15,000/=.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Koofur waxaa ka xiga: Sahra

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

Bari waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 15 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 593

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jilo Mire Cali Cosoble uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 27.11.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley Waddada ——— qaabkiisu yahay Rettangolar addimihiisuna yihiin 27x13,50 kuna fadhiya mq. 364

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Ummadda.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul Lambar 1264

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lambar 1269-1267

Bari waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu sii fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 15 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHUL[illegible]EE D. HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabd[illegible])

L. 594

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cabdulcasiis Iimaan Nuur uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose eeMuqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 12.4.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq-Shiid Waddada ———— qaabkiisu yahay Trabesiyo addimihiisuna yihiin 12+7).20 kuna fadhiya mq. 190.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhulkiisii hore

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad

Bari waxaa ka xiga: Waddada Balcad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu s' filcan uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doon karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 15 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Joem. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 595

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cabdi Sheekh Xasan uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 28.9.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq-Shiid Waddada ———— qaabkiisu yahay Afar Gees Isle'eg addimihiisuna yihiin 100X100 kuna fadhiya mq. 10.000/=.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

Bari waxaa ka xiga: Dhul.-

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 15 Gen. 1985

MAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 596

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamed Cali Caarif uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 27.9.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wardhiigley Qaabkiisu yahay Afar Gees Isle'eg Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya mq. 400.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Guri dad

Galbeed waxaa ka xiga: Guri dad

Bari waxaa ka xiga: Waddada J. Daa'uud.

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si iiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 15 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 597

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cabduraxmaan Muxyadiin Nuur iyo Cabdulqaadir Maxamed ay u soo qorteen arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 25.11.1984 ay ku weydiisteen gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Waddada B/Qaasim qaabkiisu ayhay Quadrato addimihiisuna yihiin 48X48 kuna fadhiya mq. 2.304.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga; Waddada Bender Qaasim

Koofur waxaa ka xiga; Waddo

Galbeed waxaa ka xiga; Waddo

Bari waxaa ka xiga: Dhul dad

arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Qotkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 22.1.1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 598

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cabdurasuul Xuseen Yuusuf uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 9.9.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Hodan Waddada Afgooye-Xamar qaabkiisu yahay Rettangolar addimihiisuna yihiin 150X120 kuna fadhiya mq. 18.000.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Afgooye-Xamar

Koofur waxaa ka xiga: Gofka Maxamuud Maxamed

Galbeed waxaa ka xiga: Goofka Axmed Maxamed

Bari waxaa ka xiga: Goofka Muuse Sheekh.

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 26.1.1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
(J.le Maxamuud Cabdi Cusmaan)

L. 599

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO WAAXD ADHULKA RASMIGA AH BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weyliistay J.le Jimca Cilmi Xayle maalintii taariikhdu ahayd 15.10.61 loona oggolaaday oo ku yaal Muqdisho, Degmada Warahiigley Qaabkiisu ahaa Trabesiyaale Addiminisuna ahaayeen 40; 30; 17, kuna fadhiyey 1200 MQ. looga qaaday dan guud awgeedlooguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wardhiigley sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa 1460/539 ee 4.6.68 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guud awgeed wuxuu ku yaal Deg. Wardhiigley, Qaabkiisu waa ELLE, Addimihiisuna yihiin 23, 13, 50) + (13,50-X19,20) kuna fadhiya 569,70 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada cusub

Bari waxaa ka xiga: Xasan Cali M. iyo Cali Cumar

Muqdisho, 23.12.1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
(J.le Maxamuud Cabdi Cusmaan)

L. 600

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Shariif Xasan Shariif;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhimay Jeeg war. Lr. 0273115, lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50.000/= kuna qoran yahay magaca J.le Maryan Cabdi Yuusuf sida ku cad war. Lam. 0532 Tr. 18.8.86, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEESIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Lr. 0273115 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= kuna qoran yahay magaca J.le Maryan Cabdi Yuusuf.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad in ay siiso J.le Shariif Xasan Shariif lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 50.000/= oo ah beddelkii Jeegga L. 0273115 ee kor ku tilmaaman, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 beri, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.8.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 601

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Muxyadiin Cali Xasan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 4 Jeeg Lr. 110024-110027-110028-110029 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Boosaaso kuna kala jirto midkiiba lacag dhan Sh.So. 100.000/= isugeyn 400.000/ kuna qoran magaca J.le Xuseen Gaceyte Xuseen sida ku cad warqadda Lam. 3745 Tr. 27.8.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Boosaaso;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEESIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Lr. 110024-110027-110028-110029 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Boosaaso kuna jirto midkiiba Sh.So. 100.000/= isugeyn 400.000/ kuna qoran magaca J.le Xuseen Gaceyte Xuseen.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Boosaaso in ay siiso J.le Muxyadiin Cali Xasan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 400.000/= oo ah beddelkii Jeegagga kor ku xusan, markay ka soo wareegto mudac aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta [illegible] lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii intii ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.8.1986
L. 602

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Cumar Cali Jaamac;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lr. 11886 NCR. laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/ kuna qoran magaca J/le Cumar Cali Jaamac sida ku cad warqadda Lam. 6512 Tr. 7.9.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEESIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lr. 11886 NCR. laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Cumar Cali Jaamac.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. 1aad in ay siiso J.le Cumar Cali Jaamac lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000/= oo ah beddelkii Jeegga kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood laga bilaabo maalintago'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.9.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L 603

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Caasha Samatar Yuusuf;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 177916 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Xadde Guure Afey sida ku cad warqadda Lam. 9082Tr. 6.9.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lr. 177916 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Xadde Guure Afey;

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco in ay siiso J.le Caasah Samatar Yuusuf lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000/= oo ah beddelkii Jeegga kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.9.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 604

MAXKAMADDA G.W/G. HAGEYSA

MGH/26/86, Taariikhda 26.8.86

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W/G. Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Muuse Maxamed Samatar, kuna taariikhaysan 11.8.86, uuna ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee lumay ee hoos ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangigu Laamiihiisa iyo Xisaabaha Guud u wada diray ee taariikhdiisu tahay 23.8.86;

MARKUU ARKAY: Xaashida Lam. yahay 0646 ee taariikhdeedu tahay 24.8.86, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Hargeysa, ayna ku caddeeyeen in Jeeggaas Wareega ee lumay ee Lam. yahay 641069 ee Lacagtiisu tahay 14,950/ Shilin, ee ku taariikheysan 13.8.86 lagana sameeyey Laanta laad ee Hargeysa, loona sameeyey Sheekh Geedi Maxamed Shire;

MARKUU ARKAY: In Jeeggaas Wareega ee lumay Lacagtiisa uu iska leeyahay Muuse Maxamed Samatar;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegga Wareega ee lumay ee lambarkiisu yahay 641069 loona cusbooneysiiyo Muuse Maxamed Samatar, Cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah, ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Hargeysa in uu Nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Iridhiisa si ciddii haysata Jeeggaas Wareega ee lumay ee kor lagu kansal gareeyey ay uga soo qortaan cabasho had iyo ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W/G. Hargeysa
(Ibraahin Faarax Maxamed)

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka W/G. Hargeysa

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Cumar Maxamed Cabdulle;

HADDU UTIXGELIYAY: In uu lumay Jeeg War. Lr. 0301401 iaga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Kismaayo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 45.000/ kuna qoran magaca J.le Cumar Maxamed Cabdulle sida ku cad warqadda Lam. 9367 Tr. 13.9.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Kismaayo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lr. 0301401 iaga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 45.000/= kuna qoran magaca J.le Cumar Maxamed Cabdulle.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo in ay siiso J.le Cumar Maxamed Cabdulle lacagta cadeedu tahay 45.000/= oo ah beddelkii Jeegga kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 13.9.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 606

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Xasan Faarax Buuni;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen (2) Laba Jeeg Lr. 0331663 iyo 0331665 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. laad Hargeysa kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= iyo 40.000/ isugeyn 90.000/ kuna qoran magaca J.le Xasan Faarax Buuni sida ku cad warqadda Lam. 9560 Tr. 18.9.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. laad Hargeysa;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Lambarradoodu kala yihiin 0331663 iyo 0331665 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta laad Hargeysa kuna kala jirto lacag dhan midkiiba Sh.So. 50.000/ iyo 40.000/= isugeyn 90.000/ kuna qoran magaca J.le Xasan Faarax Buuni.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. laad ee Hargeysa In ay siiso Jaalle Xasan Faarax Buuni lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 90.000/= oo ah beddelkii Labada Jeeg ee kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.9.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

I. 607

MAXKAMADDA G.W/G. HARGEYSA

MGH/28/86 Hargeysa 11.9.86

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W/G. Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cali Xasan Xaaji Isxaaq ee 6.9.86 uuna ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee lumay ee Lam. 1005 ku xusan yahay;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangigu Laamiihiisa iyo Xisaabaha Guud u aja diray ee 9.8.86;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa ee Lam. yahay 0892 ee 7.9.86 in Jeeggaasi Lam. yahay 0244904, taariikhdiisuna tahay 16.6.86 Lacagtiisuna tahay 50,000/= kuna qoran magaca Cabdulqaadir Maxamed Ciise, lagana sameeyey Laanta Burco;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee 9.9.65kii;

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegga Wareega ee Lumay ee Lambarkiisa, Taariikhdiisa, Lacagtiisa, magaca ku qoran iyo Laanta laga sameeyeyba kor ku xusan yihiin uu lacagtiisa iska leeyahay Cali Xasan Xaaji Isxaaq cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood ah ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Hargeysa in uu Nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdhiisa si ciddii haysata Jeeggaa Wareega ee lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W/G. Hargeysa
(Ibraahin Faarax Maxamed)

Kaaliyaha Maxkamadda G.W.G. Hargeysa

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDU UARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Biyood Xaashi Canshuur;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 1408 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 4.872.85 kuna qoran magaca J.le Biyood Xaashi Canshuur sida ku cad warqadda Lam. 705 Tr. 9.9.86 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lambar 1408 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 4.872.85 kuna qoran magaca J.le Biyood Xaashi Canshuur Faarax.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Wadajir in aii siiso J.le Biyood Xaashi Canshuur lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 4.872.85 oo ah beddelkii Buug Kaydka kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah lagakeenin.

Muqdisho, 9.9.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 609

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/DHEXE JOWHAR

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Sh/Dhexe Jowhar

HADDUU ARKAY: Arjiga dacwadda ku qoran;

MARKUU ARKAY: Waxay ku saabsan tahay iyo Ogeysiiska Bangiga;

HADDUU ARKAY: Qod. 69-9-9-65 L.2 Lumiddа Jeegga Wareega lamb. 192507, ku qoran Xasan Cumar Guuleed.

Wuxuu amrayaa in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ka dib markii ay ka soo wareegto 15 shan iyo toban maalmood, maalinta Degereetada lagu Shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dowladda.

Waxaa la codsanayaa in Jeegga Wareega ee la sameyn doono gacanta laga saaro Xasan Cumar Guuleed ama ciddii Wakaalad sharci ah ka wata isaga oo la sugayo muddada aan kor ku soo sheegnay.

Jeeggaas oo ku qoran Sh.So. 7.900/=.
Jowhar, 14.6.1986

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Sh/Dhexe Jowhar
(Dr. Bashiir Raabi Faarax)

L. 610

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Jeylaani Munye Aadan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen (2) Laba Jeeg Wareega Lr. 009077-009078 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna kala jirto midkiiba lacag dhan Sh.So. 40,000/= kuna qoran magaca J.le Cali Nuur Calj Ayaanle sida ku cad warqadda Lam. 9395 Tr. 14.9.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaljyeed Laanta Kismaayo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lr. 009077-009078 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaljyeed Laanta Kismaayo kuna kala jirto lacag dhan midkiiba Sh.So. 40.000/= kuna qoran magaca J.le Calj Nuur Cali Ayaanle.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Kismaayo in ay siiso J.le Jeylaanj Munye Aadan lacagta cadadeedu kor ku qoran tahay oo ah bedelkii Jeeg. War. ee kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga biliaabo maaljnta go'aanka lagu lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah aan laga keenjn.

Muqdisho, 15.9.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Saiaad Shangole)

L. 611

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDU UARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Mustafa Aadan Ciise;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen (2) Laba Jeeg War. Lr. 057607-0576708 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Wardhiigley kuna jirto midkiiba lacag dhan Sh.So. 100,000/= isugeyn 200,000/ kuna kaa qoran yihiin magacyada J.le Daahir Shooble Daahri iyo Cabdirashiid Xaaji Daa' d sida ku cad warqadda Lam. 424 Tr. 24.9.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lamb. 0576707-0576708 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna kala jirto midkiiba lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna kala qoran yihiin J.le Daahir Shooble Daahir iyo Cabdirashiid Xaaji Daa'uud.

WAXAA LA FARAYAA

Bangiga Ganacsiga iyoKaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley in ay siiso J.le Mustafa Aadan Ciise lacagta cadadkeedu kor ku qoran yahay oo ah beddelkii (2) Labadaasi Jeeg War. ee kor ku xusan, maray ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.9.19x6

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 612

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cabdulqaadir Jaamac Xasan.

HADDUU TIXGELIYEY: In Jeeg Wareega Dhumay L. 00112249. Laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Balcad kuna qoran kuna jirto Lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J/le Dhaqane Yuusuf Maxamed sida ku cad Warqadda Lr. 6539 ee Tr. 28,9,86 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Lanta Koowaad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9,9,1962dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Wareega Lr. 00112249 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soo maaliyeed Laanta Balcad kuna jirto Lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J/le Dhaqane Yuusuf Max/d.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Balcad in ay siiso J/le Cabdulqaadir Jaamac Xasan Lacagta Cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah beddelkii Jeegagga kor ku Xusan. Markay ka soo wareegto muddo aan ka yaren 15 Bari ah laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.9.86.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole

Kaaliyaha Maxkamadda
Cabdulqaadir Cali Xaaji
613

MAXKAMADDA GOBOLKA BAY EE BAYDHABO

MARKUU ARKAY: Arjiga Codsiga Baafinta Jeega ee ku Tr. 31,8,86.

MARKUU ARKAY: Dacwadda Kor ku Qoran.

MARKUU ARKAY: Waxay ku saabsantahay iyo Ogeysiis ka Bankiga.

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9/9 65 D. iyo Lumidda J. L. 0395631 ayna ku qoran tahay Lacag dhan Sh.So. 100.000 Shilljin.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegga ka dib markii ka soo War eegto 15 Casho maalinta Dekareetada lagu shaacyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waxaa la caddeynayaa in Jeegaas Cusub loo sameyn doono Gacanta laga saaro J/le Xuseen Samow Ibraahim, Ama Qof isla Asaga ka sita Wakaalo Sharci ah iyadoo la sugayo 15 Beri.

Guddomiyaha Maxkamadda Gobolka Bay
Sheekh Xuseen Macallin

I. .614

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

MGH/29/86 Taariikhda 15.9.86

UJEEDDO:- Digireeto Cusboonaysiin Afarta Jeeg Waree ga ee lumay ee Lambarradooda, Lacagtooda, Laanta laga sa. meeyey, Taariikhdooda iyo magaca loo sameeyey mid walba, oo kala ah Sidan:.

1) J.W.No. 22764 ee 22.5.86 ee Sh.So. 20,000/= u qoraa Axmed Cali Xuseen, laga sameeyey Laanta Qardho.

2) J.W.No. 0276892 ee 20.7.86 ee Sh.So. 50,000/= ku qoraa Axmed Ismaacil, laga sameeyey Laanta laad ee Har. geysa.

3) J.W.No. 348692 ee 3.5.86 ee Sh.So. 19.650/= ku qoraa Xuseen Maxamuud, laga sameeyey Laanta laad Hargeysa.

4) J.W. No. 456837 ee 5.7.86 ee Sh. So. 50.000/= ku qoraa Maxamed Ibraahin Yuusuf, laga sameeyey Laanta Kismaayo.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cusmaan Dii. riye Rooble ee 13.9.86 ee uu ku codsanaayo in loo Cusboonay. siiyo Afarta Jeeg Wareega ee lumay ee Lambarradoodu kor ku xusan yihiin;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangigu Laamihiisa iyo Xi. saabaha Guud u kala diray ee 28.8.86;

MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa ee lambarkeedu ya. hay 0909 ee 14.9.86 ee ay ku soo caddeeyeen Afarta Jeeg Wa. reega ee lumay Lacagtooda, taariikhdooda, Laanta laga sa. meeyey, magaca loo sameeyey iyo Lambarradooda.

MARKUU ARKAY: In Lacagta Jeegaggaasi lumay ku qoran uu iska leeyahay Cusmaan Diiriye Rooble;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambar. kiisu yahay 2 ee 9.9.65kii;

WUXUU GO'AAMIYEY

348692, 4) J.W.No. 456837, in loo cusboonaysiiyo Cusmaan Diiriye Rooble, cusbooaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa in uu ku dhejiyo Nuqulka go'aankan Bangiga Irdhiisa si ciddii haysata Jeegaggaa Wareega ee lumay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
(Ibraahim Faarax Maxamed)

Kaaliyaha HMaxkamadda G. W/G. Hargeysa
(Axmed Wacays Maxamed)

L. 615

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Diiriye Axmed Ducaale;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 78789 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna jirto lacag dnan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.l eDiirjye Axmed Ducaale sida ku cadwarqaadda Lam. 2942 Tr. 21.9.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga War. Lr. 78789 ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Diiriye Axmed Ducaale.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad in ay siiso J.le Diiriye Axmed Ducaale lacagta cadeedu tahay Sh.So. 100.000/= oo ah beddelkii Jeegga War. ee kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horraysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.9.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 616

IIB MAGALE

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية — الجريدة

Sannadka 14aad Muqdisho, 1da Oktoobar 1986 L. 10

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sana dii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahe ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. [illegible] ee 13 Sebt. 1986, Dhirigelinta Macallimiinta wax ka dhigta Akadeemiyada Sare. BOG. 612

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 28 ee 13 Sebt. 1986, Xeer-Nidaamiyaha Akadeemiyada Sare ee Is/da Qaranka. » 614

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, L. 6 ee 15 Agoosto 1986, Magacaabid Guddoomiye ku Xigeenka Kowaha Shacbiga Deegaanka Degmada Luuq. » 627

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

QAYBTA SAD/XAAD

MAXKAMADDA GOB. DEG/DA BERBERA 29,7,86 Lumid Jeeg War. L. 0153727 ku qoran Cabdi Aw Saciid L. 617 » 629

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR 27,9,86, Lumid Laba Jeeg War. ku qoran Xabiib Cali Daahir L. 618 » 630

MAXKAMADDA G/DEGMADA BERBERA, 2,9,86, Lumid Laba Jeeg War. ku qoran Axmed Faarax Cali L. 619 » 631

MAXKAMADDA GOB. HARGEYSA, 20,9,86 Lumid Sadex Jeeg War. ku qoran Cabdulahi Muumin Cabdulaahi Xasan L. 619 » 632

WARSHADDA SAPONIFICIO CAD CEED, Ogeysiis Shir aan Caadi Ahayn Mid Caadi ah L. 620 » 633

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 27 ee 13 Sebt. 1986 Dhirigelinta Macallimiinta wax ka dhigta Akadeemiyada Sare.-

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka JDS Qod/sa 57aad;

MARKUU ARKAY: Sharciga 6da Abriile 1960kii;

MARKUU AQOONSADAY: Sida ay u tahay lagama maarmaan in la dhiiri geliyo macallimiinta wax ka dhigta Hay'adaha waxbarashada ee kala duwan Wasaaradda Gaashaandhigga;

MARKUU DHEGEYSTAY: Soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga;

« WUXUU SOO SAARAY XEERKA SOO SOCDA »

Qod. 1aad

Macallimiinta wax ka dhigta Akadeemiyada Sare Istraa tiijiyada, Kulliyadaha iyo Dugsiyada kala duwan ee Ciidamada waxay u kala baxaan;

A— Macallin Sarkaal Jaamici Abbaanduul Sare.
B— Macallin Sare Rayid Jaamici ah.
T— Macallin Sarkaal Jaamici Abbaanduul Caadi ah.
J— Macallin Caadi Rayid Jaamici ah.
X— Macallin Sarkaal Farsama-yaqaan ah.
KH— Macallin Rayid Farsama-yaqaan ah.
D— Macallin Sarkaal caadi ah.
R— Macallin S/Xigeen ah.

Qod 2aad

Macallimiinta ku xusan Qod. 1aad, waxay noqon karaan kuwo joogto ah iyo kuwo aan joogto ahayn.

Qod. 3aad

Macaljimiinta ku xusan xarfaha «a,b)» markay joogto yihiin waxay qaadanayaan Gunno ah Sh.So. 2.000/= Bishii, marayna joogto ahayn waxay qaadanayaan Gunno ah Sh.So. 76,90 maaljntii ay dersi bixiyaan.

Macallimiinta ku xusan xarfaha t, , waxay qaadanayaan markay oogto yihiin Gunno Sh,So, 1.500 Bishii, markayna joogto ahayn waxay qaadanayaan Gunno Sh,So, 57,70 maaljntii ay dersi bixiyaan.

Macallimiinta ku xusan x,kh, waxay qaadanayaan haddey joogto yihiin Gunno ah Sh,So, 1.000 Bishiiba, markayna joogta ahayn waxay qaadanayaan Gunno ah ShS, 38 maalintii ay dersi bixiyaan.

Macallimiinta ku xusan xarafka d, waa joogto waxay na qaadanayaan Gunno ah Sh,So, 700 Bishii.

Macallimiinta ku xusan xarafka r. waa joogto waxay na qaadanayaan Gunno ah Sh,So. 300 Bishii.

Qodobka 4aad

Xeerkaan ma khuseeyo Macallimiinta Ajnabiga ah oo ay W. Gaashiindhigga Dibadda ka keento kuwaas oo lagu maamulayoheshiisyada gaarka ah oo lala galo.

Qodobka 5aad

Xeerkaan wuxuu bedelayaa shaxda b ee xeerka lamba rkiisu yahay 1219 ee soo baxay 1.1.1976.

Qodobka 6aad

Xeerkaan wuxuu dhaqan gelayaa 1.8.1986.

Muqdisho. 13 Seb. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Xeer Madaxweynaha J.D.S. 28 taariikh 13 Sebt. 1986 Xeernidaamiyaha Akadeemiyada Sare ee Isterajiyada Qaranka ee Sayid Maxamed Cabdulle Xasan.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 57aad ee Dastuurka J.D.S,

MARKUU ARKAY: Sharciga 6da Abriil 1960kii.

MARKUU ARKAY: Sharciga Abuuridda Akadeemiyada Sare ee Isteratijiyada Qaranka Sayid Maxamed Cabdulle Xasan.

MARKUU DHEGEYSTAY: Soo jeedinta W. G/dhigga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeernidaamiyaha Soo Socda.

Qodobka 1aad

UJEEDDOOYINKA GUUD EE AKADEMIYADA

Akadeemiyada Sare ee Isteratejiyada Qaranka Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, oo ka mid ah saldhig Cilmiyeedyada J.D.S. Kuwa ugu sarreeya waxaa loo abuuray in lagu ballaariyo laguna mideeyo aragtida masuuliyiinta Qaranka iyo aqoonyahannada Soomaaliyeed xagga horumarinta Istratejiyada Qaranka dhinacyada Siyaasadeed Dhaqaale, Bulsho iyo Mileteri.

Qodobka 2aad

HIMILOOYINKA AKADEEMIYADA

Himilooyinka Waxbarashada waa:—

1. Dersidda, horumarinta iyo mideynta fikradda Isteratejiyada Soomaaliyeed, si loo xaqiijiyo nabadgelyada Qaranka, loona gaarsiiyo bulsho weynta Soomaaliyeed ho rukac deg deg ah oo la saan qaadi karo Adduunka horay u maray.

2. Kobcinta barasho cilmiyeedka masuuliyiinta iyo aqoonyahannada kale arrimaha la xiriira waayaha Soomaaliyeed iyo dhibaatooyinka ka soo hor jeeda si ay isku la meel dhgaan habka ugu habboon ee looga hor tegi ka

3. Sare u qaadidda barashada falsafadda fanka hawl galka casriga iyo Isteratejiyada guud ee lagu hoggaamjnayo dagaaladda casriga ah iyo loolannada ka dhe xeeya Quwadaha Waaweyn.

4. In ay xil iska saarto kana qeyb qaadato horuma rinta cilmi baarista Soomaaliyeed, qaar ahaan arrimaha la xiriira Nabadgelyada Qaranka iyo Isteratejiyada Mileteriga.—

5. In ay ka qayb gasho hagaa inta habka maamulka Qaranka iyo Dawladda iyadoo u adeegaysa xaqii inta horumarka bulsho weynta Soomaaliyeed.

Qodobka 3aad

Habka Dhismaha iyo Maamulka Akadeemiyada

1. Akadeemiyada Sare ee Isteratejiyada Qaranka waxay ka mid tahay hay'adaha waxbarasho ee hoos yimaad W. Gaashaandhigga waxaana hawlaheeda si toos ah u hoggaaminaya Taliyaha Akadeemiyada oo uga mas' uul ah Wasiirka W. Gaashaandhigga, dhinaca waxbarasho iyo maamulba.

2. Akadeemiyadu waxay yeelanaysaa Guddi Sare oo qorsheeya, Jaangooya, Go'aamiya Siyaasadda Guud ee Waxbarashada Akadeemiyada, horumarinta cilmi baarista Akadeemiyada iyo aqoon yahanada, sidoo kale sharciyeynta go'aanada dooda baarista qalin jebinta.

3. Guddiga Sare Akadeemigu wuxuuuu ka kooban yahay xubnaha soo socda.

a) Madaxweynaha J.D.S. Gudoomiye Sharafeed
b) Wasiirka W. G/Dhigga J.D.S. Guddomiye
t) Wasiirka Arrimaha Gudaha J.D.S. Xubin
j) Wasiirka Arrimaha Dibadda J.D.S. Xubin
x) Wasiirka Maaliyadda J.D.S. Xubin
kh) W. Tacliinta Sare iyo Hiddaha J.D.S. Xubin
d) Wasiir ku xigeenada W. G/Dhigga Xubin
r) Taliyaha Akadeemiyada Xubin
s) Rektarka Jaamacadda Um. Soomaaliyeed Xubin
sh) Madaxa Hoggaanka Tababarka W.G.DH. Xubin

f) Madaxa Hay'adda W/da Akadeemiyada Xoghayn

4. Guddiga oo joogto noqonaya wuxuu iskugu imaa nayaa fulinta hawlahiisa bilowga iyo dhamaadka sanad waxbarashadeedka Akdaeemiyada iyo markii loo baahdo hadba guddonka iyo meesha uu Guddomiyuhu xaddido.

5. Inta uu socdo sannadka waxbarashadu waxaa hawlaha waxbarasho ee Akadeemiyada hoggaaminaya guddiyada tacliinta ee kulliyadaha iyo Taliyaha Akadeemiyada iyo taliyayaasha kulliyadaha iyagoo ka shidaal qaadanaya awaamiirta Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga:

6. Guddiga Sare ee Akadeemiyada waxaa isugu yeeraya guddoomiyaha Guddiga sare, waxaana go'aanadiisu ku ansaxayaan haddii ay ka qayb galaan aqlibiyadda xubnaha.

Qod. 4aad

BARAYAASHA AKADEEMIYADDA;

1. Akadeemiyadda waxaa wax ka qhigaya masuuliyiinta sare ee Qaranka ee waaya aragnimada iyo aqoonta ien, borofaradda iyo barayaasha sare ee jaamacadda qaika, aqoon yahannada Ciidamada Qalabka Sida iyo ciddii kale ee loo baahdo.

2. Macalliimiinta wax ka dhigeysa Akadeemiyadda ee ka baxsan Wasaaradda Gaashaandhigga waxaa magacaabaya Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga ka dib markuu dhegeysto soo jeedinta guddiga sare ee Akadeemiyadda:

3. Barayaasha aan joogtada ahayn waxaa oggolaanaya Taliyaha Akadeemiyadda.

4. Barayaasha wax ka dhigaya Akaeemiyadda Sare Istratejiyadda qaranka ee SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN waxay u kala baxayaan sida soo socota:

b) Bare Rayid ah

t) Bare Ciidamada ah.

— Shuruudaha baraha Rayidka ah, wuxuu ku xusan yahay Faafinta Rasmiga ah oo lambarkeedu yahay L. 12-1 Disembar 1977 QODOBADIISA kala ah 58, 59, 60, 61 iyo 62

bjyey Kuljiyadaha kala duwan ee Akadeemiyaddaan ama kuwa u dhigma oo leh waayo aragnimo oo aan ka yareyn laba sanno.

Bare waxaa noqon kara sarkaalkii ka soo qaaiin jebiyey Kuljiyadaha kala Duwai ee Akadeemiyaddaan ama kuwa u dhigma oona garto inuu wax ka dhigi karo Akadeemiyaddaan.

Qod. 5aad

Gunnooyinka Macaliimiinta iyo shaqaalaha Akadeemiga waxay ku xusan yiniin Xeer Lanbar ————.

Qod. 6aad

XIRIIRKA AKADEEMIYADDU LA LEEDAHAY HAY'ADAHA QARANKA IYO KUWA KALE:

1. Akadeemiyaddu waxay u madax Bannaan tahay in ay xiriir toos ah oo Iskaashi Cilmiyeed ah la yeelato hay'adaha Qaranka, xarumaha cilmiga iyo qoon yahannada la shaqeeya dalka oo Soomaali ah.

Qod. 7aad

SHURUUDAHA GUUD EE SOO GELITAANKAAKADEEMIGA:

1. Shuruudaha ka qayb gelidda Akadeemiyaddu waa kuwa taclimeed iyo kuwa la qiimaha ah hadba iyada ku xiran Kulliyadda Waxbarashada waxay is tiftiran ugu cad yihiin xeer nidaamiyahaan qaybaha Waxbarashada Kulliyadda.

2. Ka qaybgalayaasha wax ku baranaya Akadeemiyadda Kulliyadaheeda kala duwan waxaa loogu soo gudbinayaa maamacyadooda Akadeemiyadda Amar uu Saxiixay Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga oo isla markaana ah Guddoomiyaha Guddiga sare ee Akadeemiyadda.

3. Inta uu ku jiro ka qaybgaluhu Waxbarashada Akadeemiyadda Iyadoo ay Suurta gal tahay in uu ku sii Magacaawnaado xilkiisa, waxaa laga Madax baneynayaa Hawl maalmeedkii uu hayey si uu awood ugu yeesho Waxbarashada.

Qod. 8aad

1) Maqnaansho ka badan 45 Casho Sabab iyo Sabab la'-aanba Ama 15 maalmood oo xirir ah sabab la'aan.

2) Jirro uu caddeeyey guddiga Takhaatiirta ee Ciidanka Xoogga dalka Soomaaliyeed in waxbarashada aanu wadan karin.

3) Duruuf kale oo jama fiilaan ah oo ku yimaada ka qaybgalaha aqoonsadayna guddiyada tacliinta Akadeemiyadda ee kala duwan.

4) Awoodda ka saaridda Akadeemiyadda waxaa leh Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga kadib markii uu dhegeysto soo jeedinta Taliyaha Akadeemiyadda oo ku saleeysan soo jeedinta guddiyada Kulliyaddaha.

Qod. 9aad

DARAJO CILMIYEEDKA AKADEEMIGA BIXINEYSA:

1) Akadeemiyadda Sare ee Istarateejiyada Qaranka SAYID MAXAMED C/LLE XASAN Labadeeda Kulliyadoodba waxay siinayaan ka qalin jebiyeyaasho si guul leh ku dhameysta waxbarashadooda:

— Kulliyadda sare ee Dagaalka:- Diplomka ka qalin jebinta Kulliyadda Sare Dagaalka.

—Kulliyadda Sare ee Difaaca iyo Nabadgelyada Qaranka:- Diplomka ka qalin Jebinta Kulliyadda Sare Difaaca iyo Nabadgelyada Qaranka.

2) Waxaa kaloo la siinayaa ka qalin jebiyeyaasha Akadeemiyadda «ASTAAMO» u gaar ah Kulliyaddaha kala duwan ama Akadeemiyadda guud ahaan.

3) Ka qaybgalihii buuxiya shuruudaha soo gelitaanka si guul lehna ku dhameeya Kulliyadaha waxaa loo ogolaan karaa inuu diktoora ku sameeyo Culuunta militeriga iyo Difaaca iyo Nabadgelyada Qaranka

Qod. 10aad

LUQADAHA WAXBARASHADA AKADEEMIGA:

Qod. 11aad

KULLIYADAHA WAXBARASHADA EE APADEEMIGA:

1) Akad miga Sare ee Istarateejiyada Qaranka SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN waxay ka kooban tahay laba kuliyadood oo Sare:

a) Kuliyadda Sare ee Dagaalka.
b) Kuliyadda Sare ee Difaaca iyo Nabadgelyada Qaranka.

QAYBTA 2AAD

KULIYADDA SARE EE DAGAALKA

Qodobka 12aad

UJEEDADA KULIYADDA SARE

1) Kuliyadda Sare ee Dagaalka waa hay'adda Waxbarasho ee ugu sareysa hay'adaha tacliinta Ciidamada Qalabka u lagu derso laguna barto Istarateejiyada iyo fanka haw.galka Ciidamada.

2) Waxaa lagu diyaarinayaa Saraakiisha Sare ee noocyada Ciidamada, qorshaynta iyo abaabulka hawlaha Abbaanduuliyadda Sare, barbaarinta Kaadirka Sare ee waxbaridda Cilmi baarista.

3) Waxay faaqidaad iyo cilmi baarisba ku sameeysaa culuunta militeriga ah; sidoo kale dersidda iyo dejinta dottorjinadda iyo habka horumarinta qaab dhismeedka noocyada Ciidamada kala duwan.

Qodobka 13aad

QAAB DHISMEEDKA IYO MAAMULKA KULIYADDA SARE EE DAGAALKA:

1) Kuliyadda Sare ee Dagaalka iyadoo ka mid ah Kuliyadaha Akadeemiyadda Sare ee Istarateejiyada Qaranka SAYID MAXAMED C/LLE XASAN ayey mas'uul uga tahay Akadeemiyadda Fulinta Ujeedooyinka Waxbarasho ee takhasuska Dagaalka.

Wasaaradda Gaashaandhigga Isaoo dhegeystay soo jeedinta Taliyaha Akadeemiyadda Waxaana fulinta hawshiisa ku caawinayo guddi waxbarasho oo ka kooban:

— Taliyaha Kuliyadda Guddoomiye
— Taliye Xigeenka Kuliyadda Xubin
— Madaxa Sikiladda waxbarasho ee muhimka ah Xubin
— Madaxa Waaxda Waxbarashada Kuliyadda Xoghayn

3) Guddiga Waxbarashada ee Kuliyadda waxaa xil ka saaran yahay Falanqaynta isku dubaridka iyo habsami u fulinta Waxbarashada Kuliyadda loo jaan goyey, diyaarinta barnaamijyada la xiriira Xilliyada waxbarasho, doodaha qalin jebinta iyo cilmi Baarista.

Xubnaha guddiga waxay xaq u leeyihiin in ay u soo jeediyaan Taliyaha Kuliyadda wixii horumarin ah waxbarasho ama guud ahaanba u jaheysan fulinta ujeedooyinka Kuliyadda.

4) Guddigu wuxuu shirarkiisa caadiga yeelanayaa xilli waxbarashadeedkiiba bilowgiisa iyo dhammaadkiisa; sidoo kale markii uu Guddoomiyaha ugu muuqdo in loo baahan yahay.

5) Markasta oo uu guddigu yeesho fadhi caadi ah ama aan caadi aheyn waa in uu taliska Kuliyaddu u soo gudbiyaa Taliska Akadeemiyadda Go'aanada iyo soo jeedimaha guddiga.

Qodobka 14aad

MUDADA WAXBARASHADA EE KULIYADDA SARE EE DAGAALKA:

1) Muddada Waxbarashada ee Kuliyadda waa sida waafaqsan jaangooyada manhaj sannadeedka Waxbarashada.

Qodobka 15aad

SHURUUDAHA SOO GELITAANKA KULIYADDA SARE EE DAGAALKA:

1) Waa in ayan darajadiisu ka yareyn G/le Dhexe.

2) Waa in uu haystaa shahaadada «majiisteer» ee cuhuunta Militeriga

3) Waa in uu yahay Sarkaal loo xulay inuu jaga sare ka qabto Ciidamada dhexdooda.

4) Intaa waxaa dheer:

a) Inuu Caafimaadkiisu wanaagsan yahay qabina jirooyinka hor istaagi kara Waxbarashada.

Qodobka 16aad

HANNAANKA WAXBARASHADA KULIYADDA SARE EE DAGAALKA:

1) Saldhigga waxbarasho ee Kuliyadda Sare ee Dagaalka waa Fanka Hawlgalka Ciidamada (Heer Ciidan) Istarateejiyada Casriga ah iyo tan Qarankaba aragti iyo fal ahaanba; waxaana arrimahaas loo dersayaa si uu adeegeysa Dagaalka loo wada dhan yahay ee Casriga ah.

Intaa waxaa dheer Casharro iyo muxaadaraad la xiriira Tadriinta Sare ee Ciidamada, tan guud iyo doodo Cilmiyeed loo wada dhan yahay.

2) Inta uu socdo Sannadka Waxbarashadu waxaa ka qaygalaha laga qaadayaa tijaabooyin iyo imtixaano xilli kasta oo waxbarasho Dhammaadkiisa ah, iyadoo xilli kasta loo qiimeynayo gaarkiisa.

3) Hawlaha waxbarasho ee Kuliyadda Sare ee Dagaalka waxaa ka mid ah booqashooyin ka qaybgalayaashu ku tagaan Ciidamaha Jiidaha Hore ee Difaaca Xarumaha dhaqaale ee dalka kuwa waxbarashada iyo taariikhda; sidoo kale iyo booqashooyin lagu tago dalka dibaddiisa dawladaha aan saaxiibka nahay.

4) Waxaa lagu xirayaa sannad waxbarashadeedka «Imtixaan guud» oo looga qaadayo maadooyinka waxbarasho oo aas aasiga ah iyo doodda baaris qofeedka oo uu ku muteysanayo ka qaybgaluhu derejo cilmiyeedka Kuliyadda.

5) Hannaanka waxbarasho, Imtixaanada iyo qaabka qalin jebinta iyo dooduhuba waxay ku soo baxayaan xeer hoosaad u gaar ah Kuliyadda.

QAYBTA 3AAD

KULIYADDA SARE DIFAACA IYO NABADGELYADA QARANKA:

TILMAANTA GUUD EE KULIYADDA

) Waxay ka mid tahay Xarumaha waxbarasho iyo cilbaariseed ee ugu Sareeya Qaranka xag bulsho, dhaqaale, Siyaasad iyo Caskariba.

2) Muddada ay socoto waxbarashadu Kuliyaddu waxaa ahuurma isafgarad dhexmara kooxaha waxbarashada, kuwaasoo horay xil sare Qaranka uga hayey ama loo diyaarinayo xil mas'uuliyeed saameeya Nabadgelyada Qaranka iyo qorshaynta Istarateejiyadda, Sidaas darteed Kuliyaddu waxay u xil saaran tahay diyaarinta iyo kor u qaadidda awood cilmiyeedka Mas'uuliyiinta si ay uga hantaan jagooyin sare hoggaaminta Qaranka.

Qodobka 18aad

UJEEDDADA GUUD EE WAXBARASHADA KULIYADDA

1) Waxbarashada Kuliyadda waxaa looga dan leeyahay in si dhab ah loo baro ka qaybgalayaasha dhibaatooyinka hortaagan Nabadgelyada qaranka Soomaaliyeed, iyo falanqaynta sida ugu haboon ee xubnaha dawladdu ugu hortegi laheyd dhibaatooyinkaas wadajir ahaan iyagoo lagu barbaarinayo in ay ka xoroobaan aragtida kali ahaaneed ugana wada yeeshaan aragti Mideysan dhinacyada dhaqaalaha, bulshada, Siyaasadda iyo Caskariyada.

Qodobka 19aad

HIMILOOYINKA GUUD EE KULIYADDA:

Koobnaanta Waxbarashada Kuliyadda waxay saameeysaa

1) Barashada iyo faaqidaadda dhabta ah ee arrimaha saameeya Ummadda Soomaaliyeed, iyadoo laga dersayo arrimaha Nabadgelyada Qaranka, Xag bulsho, dhaqaale, Siyaasad iyo Ciidanba.

2) Barashada waajibaadka waxtarak iyo qaabka gudashada shaqada x Wasaaradaha, Wakaalada, hay'adaha dastuuriga ah iyo xubnaha kale ee Dawladda iyadoo si dhab ah loo fafagurayo arrimahooda, si loo gaaro aragti Mideysan iyo iskaashi loo dhan yahay oo lagu fulinayo hawlaha Nabadgelyada Qaranka.

3) Baarista iyo Falanqaynta ka imaan kara dalka gudi-

4) Garashada Qaabka (habka(lagu xaqiijin karo maslaxadda Nabadgelyada qaranka Soomaaliyeed ee baaxadaha kala gedisan.

Qodobka 20aad

QAABKA WAXBARASHADA KULIYADDA:

1) Waxabarshada Kuliyadda Difaaca iyo Nabadgelyada Qaranka waxaa saldhig u ah awoodda ka qaybgalayaasha ciimi baariseed, aqoon kororsi iyo xog agaasimo dhibaatooyinka hor yaala Qaranka iyo ka soo jeedinta talooyin wax ku ool ah.

2) Dooddu waa saldhigga waxbarashada Kuliyadda iyadoo awood loo soonayo ka qaybgalayaasha muujinta aragtidooda iyo ka baaraandegga hadba arrinta daraasadda lagu sameeynayo.

3) Isdhaafsiga doodaha run ka sheegga ah iyo xoriyadda oraahda «hadalku» waa saldhigga dhaqanka waxbarashada Kuliyadda, Sidaas awgeed inta lagu jiro Kuliyadda dhexdeeda waxay awood buuxda u leeyihiin macallimiinta iyo ka qaybgalayaasha in ay si qayaxan oo madax banaani ah u soo jeediyaan hadba wixii kala gudboon ama ay la tahay in laga qabto mawduuca doodda socota, iyadoo aan lagu xadgudbeyn dastuurka iyo shuruucda kale ee Qaranka.

4) Saldhigga shaqo ee Kuliyaddu wuxuu ku qotomaa awooddа ka qaybgalayaasha ee ay isku tusaaleyn karaan aragti kala duwan, si loo helo fikrad wax ku ool ah oo xaqiijin karta himilada Ummadda Soomaaliyeed.

Qodobka 21aad

HAWLAHA (HABKA) WAXBARASHADA KULIYADDA:

Hawlaha Waxbarashada Kuliyadda waxay ka kooban yihiin:

1) Muxaadaraad ay bixiyaan Mas'uuliyiinta waaweyn ee Qaranka borofesoorada Jaamacadaha, xarumaha cilmi baarista iyo xeel dheerayaasha dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba.

2) Dhammaaka muxaadaroojinka waxaa la is dhaafsadaa qoodo furan runsheegna ah oo ay soo jeediyaan ka qaybgalayaashu.

3) Fadhiyo baaris kooxeed (Group Research) iyo aqoon kororsi oo ay fuliyaan Kooxaha Waxbarashadu iyo baaris qofeed (Personal Research) oo gaar looga rabo ka qaybgalee kasta.

4) Dood cilmiyeed iyo fadhiyo lala yeesho mas'uuliyiinta waaweyn, xeel dheerayaasha Xarumaha cilmi baarista iyo wafuudda booqashada ku yimaada Ku jiraada.

5) Faaqidaada dhibaatooyinka yaala dalka gudihiisa iyo kuwa aduunkaba.

6) Booqasho Xarumaha waaweyn ee wax ku oolka ah ee dalka gudihiisa (kuwa dhaqaale, cilmiyeed, taariikheed iyo wax soo saarba iwm).

7) Booqasho lagu tago dal ajnabi iyo ka badanba.

8) Lafagurka dhacdooyinka iyo mashaakilka dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba iyo la socodka dhacdo maalmeedka adduunka.

Qodobka 22aad

MUDDADA WAXBARASHADA:

Muddada waxbarashada Kuliyadda waa 11-Bilood oo xiriir ah.

Qodobka 23aad

QIIMEEYNTA WAXBARASHADA KA QAYBGALAYAASHA

Ka qaybgalayaasha waxaa lagu qiimeeyaa Siyaabaha soo socda:

1) Ka qaygalka wax ku oolka ah iyo firfircoonaanta uu ka muujiyo ka qaybgaluhu hawlaha kala duwan ee Kuliyadda (Cilmiyeed, bulsho, aqoon kororsi iwm).

HADDUU TIXGELIYTY: In uu jumay Jeeg War. Lam. 0080412 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= kuna qoran magaca J.le Cali Cabdi Cabdulle sida ku cad warqadda Lr. 990 ee Tr. 10.11.86 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0080412 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/ kuna qoran magaca J.le Cali Cabdi Cabdulle.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir in ay siiso J.le Xuseen Cabdulle Joodah lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000/= oo ah beddelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 10.11.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 659

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED HARGEYSA
MGH/24/86 Taariikhda 21.8.86

UJEEDDO:- Digireeto Cusboonaysiin Jeegga Wareega ee Lumay Lambarkiisu yahay 541826 ee taariikhdiisu tahay 20.5.86 lacagtiisuna tahay 20,000/= Shilin Jeeggaas ciddii ku qorayd lama yaqaan waxaase lagu baadi goobi karaa Lambarka Jeegga, waxaana laga samee yey Bangiga Laanta Burco.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Maxamuud Maxamed Aadan, ee ku taariikhaysan 18.8.86, uuna ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee lumay ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangigu Laamiihiisa iyo Xisaabaha Guud u kala diray ee ku taariikhaysan 10.8.86;

MARKUU ARKAY: Xaashida Lambarkeedu yahay 0833 ee taariikhdeeduna tahay 19.8.86, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa, ayna ku caddeeyeen in Jeeggaas Wareega ee lumay ee Lambarkiisu yahay 541826 ee Lacagtiisuna tahay 20,000/= Shilin ee taariikhdiisuna tahay 20.5.86 lagana sameeyey Bangiga Laanta Burco, lana garanayn ciddii loo sameeyey laguna baadi goobi karo Lambarka Jeegga;

MARKUU ARKAY: In Jeeggaas Wareega ee lumay Lacagtiisu uu iska leeyahay Maxamuud Maxamed Aadan;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegga Wareega ee lumay ee lambarkiisu yahay 541826 loona cusboonaysiiyo Maxamuud Maxamed Aadan cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa in Nuqulka go'aankan uu ku dhejiyo Bangiga Irdhiisa si ciddii haysata Jeeggaas Wareega ee kor lagu kansal gareeyey ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
(Ibraahin Faarax Maxamed)

Kaaliyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
(Axmed Wacays Maxamed)

L.. 660

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Cabdullaahi Xalane Shuuriye;

HADDUU TIXGaaLIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lr. 0551870 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/ kuna qoran magaca J.le Cabdishakuur Sheekh Cabdikariin sida ku cad warqadda Lam. 12030 ee Tr. 18.11.86 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xisaabaadka Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0551870 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/Xaawo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/ kuna qoran magaca J.le Cabdishakuur Sheekh Cabdikariin

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaalyeed Laanta B/Xaawo in ay sijso J.le C/llaahi Xalane Shuure lacagta cadadeedu tahay 100.000/= oo ah beddelkii Jeeg War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii jnta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenjn.

Muqdisho, 19.11.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 661

SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONE AGRICOLE — S.I.P.A.-

Saldhigga: Shalambot -Raa'sumaal: Sh.So. 8.112.000,-

OGEYSIIS U YEERID SHIR CAADI IYO CAADI DHAAF AH

Saamileyda Shirkadda SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE— S.I.P.A. — S.P.A., waxaa la isugu yeerayaa Shir Caadi iyo Caadi Dhaaf ah, oo lagu qaban doono Muqdisho, Xarunta Somalfruit, maalinta 11 Nofember 1986, marka ay saacadda tahay 10ka subaxnimo, haddii loo baahdo waxaa Shirka mar labaad la qaban doonaa maalinta 15ka isla bisha Nofember 1986, isla saacadda iyo meesha kor ku xusan, si looga doodo go'aanna looga gaaro arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA SHIRKA

A) SHIRKA CAADIGA AH

1) Ansixidda iyo go'aaminta Miisaaniyadda la xiray 31.12.1985, Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista;

2) Magacaabidda Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.

B) SHIRKA CAADI DHAAFKA AH

1) Beddelid qodobka 3aad ee Xeerka Shirkadda.

Waxaa xaq u yeelanayaan in ay shirka ka soo qayb galaan, Saamilayda ku qoran Buugga Shirkadleyda ilaa shan maalmood ka hor maalinta la qaban doono shirka.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 662

SHIRKADDA BEER TACABKA LUUL — S.P.A.

Saldhigga: Muqdisho - Raa'sumaal: Sh.So. 1.100.000,-

OGEYSIIS U YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda BEER TACABKA LUUL —S.P.A.

waxaa la isugu yeerayaa Shir Caadi ah, oo lagu qaban doono Muqdisho, Xarunta Somalifruit, maalinta 11ka Nofember 1986, marka ay saacadda tahay 11ka subaxnimo, haddii loo baahdo waxaa shirka mar labaad la qaban doonaa maalinta 15ka Nofember 1986, isla saacadda iyo meesha kor ku xusan, si looga doono go'aanna looga gaaro arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA SHIRKA

1) Ansixinta iyo go'aaminta Miisaaniyadda la xiray 31.12.1985. Warbixinta Guddiga Maamulka iyo midda Guddi ga Baarista;

2) Magacaabidda Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.

Waxaa xaq u yeelanayaan in ay shirka ka soo qayb galaan, Saamileyda ku qoran Buugga Shirkadleyda ilaa shan maalmood ka hor maalinta la qaban doono fadhiga.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 663

IIB MAGALE

F'AAFINTA RASMIGA AH

الجريـدة الرسميـة

Sannadka 14aad Muqdisho 1da Disember 1986 Lr. 12

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة رسمية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddeelana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey waxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa **Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurtaha ee Wasaaradda Lacagta.**

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 28 ee 25 Okt. 1986, U rogid sharci, Xeer sharci L. 2 ee 8.9.86, Wax ka beddelid Xeerka sharci 2 ee 7.1.84, kuna saabsan Canshuurta gadidda Bog; 725

SHARCI L. 29 ee 29 Okt. 1986, Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda Dowladda 1986 » 726

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 32 ee 11 Okt. 1986 soo celin hanti maguurto » 728

QEYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 22.11.86, Lumid 10 Jeeg War. ku qoran

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR 2.11.86, Lumid (2) Jeeg War. ku qoran Faaduma Axmed Xaashi L. 657 » 731

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 2.11.86, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Faaduma Axmed Xaashi L. 758 » 732

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER 15.10.86, Lumid Jeeg War. Lr. 0346238 ku qoran Cali Faarax Nuur L. 659 » 733

MAXKAMADDA GOBOLKA W GALBEED 8.11.86, Lumid 11 Jeeg War. ku qoran Maxamed Axmed Seed L. 660 » 734

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER 22.11.86, Lumid Jeeg War. L. 731872 ku qoran Cali Xasan Maxamed L. 661 » 735

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 16.11.86, Lumid Buug Keyd L. 2337 ku qoran Cali Daahir Cali L. 662 » 736

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 27.11.86, Lumid Jeeg War. L. 178052 ku qoran Xasan Cilmi Maxamed L. 663 » 737

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 24.11.86, Lumid Jeeg War. L. 0631011 ku qoran Saleemaan Maxamed Cabdi L. 664 » 738

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 24.11.86, Lumid Jeeg War. L. 718648 ku qoran C raxmaan Maxamed Ciise L. 665 » 739

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.11.86, Lumid 5 Jeeg War. ku qoran Maxamed Dhicisow Faarax Lr. 665/bis » 740

SOPRAL S.P.A. «SOCIETA' PRODOTTI ALIMENTARI, Ogeysiis isu yeerid fadhi caadi

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lamb. 28 taariikh 25 Okt. 1986 U rogid sharci Xeerka sharci lamb. 2 ee 8.9.86 wax ka beddelid xeerka sharci lamb. 2 ee 7.1.84 kuna saabsan Canshuurta gadida

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELIYEY Oggolaashaha guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda.

Qodobka 1aad

Waxaa loo rogay sharci, xeerka sharci lambar 2 ee 8da September 1986. wax ka beddelid xeerka sharci Lr. 2 ee 7.1.84 Canshuurta gadidda.

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 25 Oct. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

Sharci lamb. 29 taariikh 25 Okt. 1986 Isbeddelka 1ad ee Miisaaniyadda Dowladda ee 1986.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELIYEY Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda.

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda Dowlada ee 1986, sida ku cad lifaaqa (A) iyo (B) ee sharcigan.

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 25 Oct. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

L I F A A Q A «A»

— K h a r a j k a —

MADAX — XIGE	TILMAAN	QIYAASTA HORE 1986	ISBEDELKA 1986	QIYAASTA CUSUB 1986
	Wareejinta Dibadda	688.182.399	3.301.817.601	3.990.000.000
7.1.1	Dakhliga Dibadda	2.112.594.810	497.405.190	2.610.000.000
7.1.2	Dakhliga Horumarinta	2.800.777.209	3.799.222.791	6.600.000.000

L I F A A Q A «B»

— D a k h l i —

MADAX	MADAX-XIGE	TILMAAN	QIYAASTA HORE 1986	ISBEDELKA 1986	QIYAASTA CUSUB 1986
1.4.0	1.2.8 (D)	Kaalmada Keydka	50.000.000	100.000.000	150.000.000
	» (R)	Kharajka kala Duwan	1.130.000.000	1.182.000.000	2.312.000.000
	1.3.0 (B)	Korsaarka Deynta Gud.	350.000.000	100.000.000	450.000.000
	» (T)	» »Dibed.	919.616.000	329.299.000	1.248.915.000
	3.2.1	Bixinta Deynta Gudaha	60.000.000	557.000.000	617.000.000
	3.2.2.	» » Dibeda	1.681.384.000	902.518.601	2.583.902.601
		Isugeyn	4.191.000.000	3.170.817.601	7.361.817.601

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEINAHA J.D.S. L. 32 ee 11 Okt. 1986 Soo Celin Hanti Maguurto.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad qeybta 14aad ee Dastrka ee awoodda xeer soo saarjidda.

MARKUU ARKAY: Sharciga lamb. 126 ee 8 Maajo 1972 ee Dhismaha Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida ay Wasaaradda Arrima ha Dibaddu u qabto in loo soo celiyo ma guurto guryo ah oo ay horay uga iibsatay Jabuuti.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda.

Qodobka 1aad

Shanta maguurto ee guryo oo ku yaal magaalada Jabuuti ee iminka ku qoran Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed waxaa lagu wareejiyey Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee J.D.S. maadaama ayadu horay u iibsatay.

: Qodobka 2aad

Guryaha waa in wixii ka haleysan Bankiga hagaajiyo.

Qodobka 3aad

Dhulka banaan ee Safaaraddu leedahay waa in Bankigu dhisaa si ay u galaan Dibiomaasiyiinta Safaaradda, Shaqaalaha Laamaha Bankiga iyo Caymiska, lagana qaado Ijaar macquul ah.

Qodobka 4aad

Kharajka ku baxa hagaajinta guryaha iyo dhismaha dhulka banaan waxaa Bankiga u celinaya Dawladda, waxaana la farayaa Wasaaradda Maaliyadda kharaj celintaas Bankigu siiyo markii hawluhu dhamaato.

Qodobka 5aad

Guriga Guddoomiyaha Laanta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed ee Jabuuti ku jirto, waxaa gacanta ku haynayaa Bankiga, inkastoo milkiyadiisa ay leedahay Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

Qodobka 6aad

Shaqada la xiriirta jaangoynta iyo qeymeynta waxaa si wada jir ah u xil saaran Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed iyo Safaaradda J.D.S. ee Jabuuti, waana in howshaas ku dhammaataa ugu dambeyn 30 Nofember 1986

Qodobka 7aad

Guddoomiyaha Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed waxaa la farayaa meelmarinta, celinta iyo wareejinta maguurtooyinka kor ku xusan.

Qodobka 8aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Taariikh 11 Oktoobar, 1986.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH QEYBTA SAD/XAAD

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Faadumo Axmed Xaashi.

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 10 (Toban Jeeg War.) oo Lambarradooda iyo Lacagtooduba ay mid walba yihiin sidan hoos ku qoran:-

1) Jeeg War. Lr. 0647509 Sh.So. 100.000/=
2) Jeeg War. Lr. 0647510 Sh.So. 100.000/=
3) Jeeg War. Lr. 0647511 Sh.So. 100.000/=
4) Jeeg War. Lr. 0647512 Sh.So. 100.000/=
5) Jeeg War. Lr. 0647513 Sh.So. 100.000/=
6) Jeeg War. Lr. 0647514 Sh.So. 100.000/=
7) Jeeg War. Lr. 0069187 Sh.So. 50.000/=
8) Jeeg War. Lr. 069196 Sh.So. 50.000/=
9) Jeeg War. Lr. 069197 Sh.So. 42.451/=
10) Jeeg War. Lr. 567333 Sh.So. 11.930/=

kuna qoran magaca Wasaaradda Maaliyadda sida ku cad Warqadda Lam. 1458 ee Tr. 2.11.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad;

HADDUU ARKAY: Qod. sharci Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962dii

WUXUU XEERIYEY

In La baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Lam. kor ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad kuna qoran Wasaaradda Maaliyadda;

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad in ay siiso J.le Faadumo Axmed Xaashi Lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 754.381/= oo ah beddelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Faaduma Axmed Xaashi

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lamay Jeegaga War. Lr. kala yihiin 0257670-0654083 kuna jirto lacag dhan sh.so. 30.000-100.000 kuna qoran magaca J. W. Maaliyadda sida ku cad warqadda lamb. 001764 ee Tr. 1.11.86, ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lamb. 0257670-0654083 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Ke-Sh.So. 100.000-30.000 isugeyn 130.000 kuna qoran magaca Wasaaradda Maaliyadda.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J. Faadumo Axmed Xaashi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 130.000 oo ah beddelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Taxdii inta ka horaysa wax ishortaag ah laga keenin

Muqdisho, 2.11.86.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdi Salaad Shongole.

L. 657

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J. Faadumo Axmed Xaashi

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J. War. Lr. 0624131 06224100 kuna jirto lacag dhan midkiiba sh.so. 100.000-10.000 kuna qoran magaca J. W. Maaliyadda sida ku cad warqadda Lr. 0639 Tr. 2.11.86, ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo ktydka Soomaaliyeed Laanta Sade.

HADDUU ARKAY: Qod. sharci Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lamb. 0624131-06224100 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Key-Sh.So. 100.000-100.000 isugeyn Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca Wasaaradda Maaliyadda.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad in ay siiso J. Faadumo Axmed Xaashi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000/= oo beddelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 2.11.86.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shongola.

L. 658

MAXKAMADDA G/TOGDHEER

UJEEDDO: Baafin Jeega War. ee Lr. yahay 0346238 ee Tr. Tahay 27.8.86

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta Jeega War. ee lumay.

MARKUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga & Key. Laanta Burco.

MARKUUARKAY: Qod. 69 D,L, 9.9.65 Lumid Jeega War. Lamb. yahay 0346238 ee Tr. tahay 27.8.86, ee kuna qo ran yahay Cali Faarax Nuur, kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 100.000

WUXUU GO'AAMIYEY

In loo cusboonaysiiyo Jeega War. ee kor ku xusan J/le Cali Faarax Nuur, kadib markii ay ka soo wareegto muddo dhan 20 casho, laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegaas cusub ee la sameyn doono in Gacanta laga saaro Daroor Ismaaciil Xuseen, iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO
Dr. Abuukar Islaw Cumar

L. 659

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

MGB/33/86 Taariikhda 8.11.86

UJEEDDO:- Digireeto Cusboonaysiin Jeegagga Wareega ee lumay ee hoos ku qoran.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed ee Hargeysa

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Maxamed Axmed Seed, ee ku taariikheysan 20.10.86, uuna ku Codsanaayo in joo Cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega ee ka lumay;

MARKUU ARKAY: Taarka ay Bangigu laamihiisa iyo Xisaabaha Guud u wada direen Taariikhdu markay ahayd 25.9.86;

MARKUU ARKAY: Xaashida ay Bangigu ku soo caddeeyeen Jeegaggaas Wareega ee lumay Xaashidaas oo Taariikhdeedu tahay 4.11.86 ee Lambarkeedu yahay 0974, taas oo lagu soo caddeeyey sidan:-

1) Jeeg Wareega Lr. 0403585 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
2) Jeeg Wareega Lr. 0403586 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
3) Jeeg Wareega Lr. 0403587 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
4) Jeeg Wareega Lr. 0403588 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
5) Jeeg Wareega Lr. 0403591 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
6) Jeeg Wareega Lr. 0403592 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
7) Jeeg Wareega Lr. 0403593 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
8) Jeeg Wareega Lr. 0403594 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
9) Jeeg Wareega Lr. 0403595 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
10) Jeeg Wareega Lr 0403596 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
11) Jeeg Wareega Lr. 0403597 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed

oo dhammaantoodna laga wada sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad ee Hargeysa;

MARKUU ARKAY: In Jeegaggaas Wareega ee Lumay Lacagtooda uu iska leeyahay Maxamed Axmed Seed;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambar 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegagga Wareega ee ah Kow iyo Tobanka Jeeg ee Lambarradoodu sare ku qoran yihiin, loona Cusboonaysiiyo Ninka isla leh lacagtooda oo ah MAXAMED AXMED SEED, Cusboonaysiintana Gacanta laga saaro isaga ama Ciddii Awood ka haysata MAXAMED AXMED SEED, Gacantana laga geliyo muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa, in uu Nuqulka Go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeegaggaas Wareega ee lumay ee kor lagu kansal gareeyey ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed ee Hargeysa
(Ibraahin Faarax Maxamed)

Kaaliyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
(Axmed Wacays Maxamed)

L. 660

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

UJ: Baafin Jeegga War. ee Lr. yahay 731872;
Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta Jeega Wareega ee lumay;

MARKUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco;

MARKUU ARKAY: Qod. 9 D.L. (9.9.65 Lumid Jeegga Wareega ee lam. yahay 731872 Tr. 8.9.86 kuna qoran yahay Cali Xasan Maxamed, kuna qoran lacag dhan 35,000/= kun Sh.So.

WUXUU GO'AAMIYEY

In loo Cusbooneysiiyo Jeegga Wareega ee kor ku xusan J.le Cali Xasan Maxamed markii ay ka soo wareegto muddo dhan 15 casho gudahood laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeeggaas Wareega ee la samayn doono gacanta laga saaro Cali Xasan Maxamed iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)
Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer

(Xaliimo Cabdi Aadan) (Tanza'nia)
Burco, 22.11.1986
L. 661

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga soo qortay J.le Calı Daahir Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lr. 2337 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 1.700.00/= kuna qoran magaca J.le Calı Daahir Calı sida ku cad warqadda lam. 470 ee Tr. 16.11.86 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kayd-ka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharcı Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabı'iyo «Ammortamento) Buug Kayd Lr. 2337 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Siimaalıyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 1.700.00/= kuna qoran magaca J.le Cali Daahir Calı.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley in ay siiso J.le Cali Daahir Calı lacagta cadeedu tahay Sh.So. 1.700,00/= oo ah beddelkii Buug Kaydka kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga billaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmıga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdısho, 16.11.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 662

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Xasan Cilmi Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 178052 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Shire Cali Cabdulle sida ku cad warqadda Lam. 12412 ee Tr. 26.11.86 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 178052 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran J.le Shire Cali Cabdulle.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaiyeed Laanta Burco in ay siiso J.le Xasan Cilmi Maxamed lacagta cadadee du tahay Sh.So. 100.000/= oo ah beddelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.11.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 663

MAXKAMADDA GOBOLKA BANA[illegible]

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo q[illegible]
Maxamed Cabdi

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 0631011 kuna jirto lacag dhan Sh.so. 100.000 kuna qoran magaca J/le Saleemaan Maxamed Cabdi sida ku cad warqadda Lr. La'aanta G. Tr. 20.1.86, ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed [illegible]
HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Lr. 2 ee Tr. [illegible]

WUXUU XEERIYEEY

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 0631011 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Shanaad kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca J. Saleemaan Maxamed Cabdi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Shanaad in ay siiso J/le Saleemaan Maxamed Cabdi lacag ta cadadeedu tahay sh.so. 100.000 oo ah beddelkii J/Buug keyd kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood [illegible] go'aabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee [illegible] ka hore ysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 24.11.86.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shongole.

L. 664

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdiraxmaan Maxamed Ciise

HADDUU TIXGELIYEY: In uu jumay Jeeg War. Lam. 718648 kuna jirto lacag dhan sh.so. 20.000 kuna qoran magaca J/le Cabdiraxmaan Maxamed Ciise sida ku cad warqadda jr. 001874 ee Tr. 23.11.86, ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. Xarunta

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 718648 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. Xarunta kuna jirto lacag dhan sh.so. 20.000 kuna qoran magaca J/le Cabdiraxmaan Maxamed Ciise.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J/le Cabdiraxmaan Maxamed Ciise Lacagta cadadeedu tahay sh.so. 20.000 oo ah bedelkii J/Buug keyd kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka hore ysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 24.11.86.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdi Salaad Shongole.

L. 665

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cali Xuseen Rooble.

HADDUU TIXGELIYEY: In ay ka lumeen Jeeg War. 730551 kuna jirto lacag dhan sh.so. 50.000 kuna qoran magaca J/le Ibraahin Aar Xandule, sida ku cad warqadda lamb. 12487 ee Tr. 26.11.86 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Burco.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 730551 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan sh.so. 50.000 kuna qoran magaca J/le Ibraahin Aar Xandule.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Burco in ay siiso J/le Cali Xuseen Rooble lacagta cadadedu tahay sh.so. 50.000 oo ah beddelkii J/Buug keyd kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maa lmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 27.11.86.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shongole.

L. 666

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortayJ.le Maxamed Dhicisow Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay ka lumeen 5 Jeeg War. oo Lambarradooda iyo Lacagtoodaba ay mid walba yihiin sidan hoos ku qoran:-

1) Jeeg War. Lr. 212223 Sh.So. 100.000/=
2) Jeeg War. Lr. 212224 Sh.So. 100.000/=
3) Jeeg War. Lr. 212225 Sh.So. 100.000/=
4) Jeeg War. Lr. 9711 Sh.So. 50.000/=
5) Jeeg War. Lr. 9712 Sh.So. 40.000/=

kuna qoran magaca J.le Maxamed Dhicisow Faarax sida ku cad warqadda Lam. 12501 ee Tr. 30.11.86 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B.G.K.S. Khaabaha Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharci Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baa'iyo (Ammortamento) Shanta (5) Jeeg War. ee Lambarradooda hor ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baladweyne, ku magacaan qoran magaca J.le Maxamed Dhicisow Faarax.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baladweyne in ay siiso J.le Maxamed Dhicisow Faarax Lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 390.000/= oo ah beddelkii 5 Jeeg War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.
keenin.

Muqdisho, 30.11.86

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

SOPRAL S.P.A. «SOCIETA' PRODOTTI ALIMENTARI»
Saldhiggeedu: Muqdisho — Raasumaalka Sh.So. 1.000.000/=

Ogeysiis ISU YEERID FADHI CAADI AAN AHAYN

Saami qabayaasha Shirkadda Sopral — «Società Prodotti Alimentari» saldhiggeedu yahay Muqdisho, waxaa la isugu yeeray shirkii aan caadi ahayn, oo lagu qaban doono xaruunta Shirkadda Sopral maalinta 14 Disembar 1986, saacaddu markay tahay 10ka subaxnimo, fadhiga ugu horreeya, haddii taas suurageli weydo, waxaa mar labaad la isugu imaan doonaa maalinta 15ka Disembar isla saacadda kor ku xusan, si go'aan looga gaaro arrimo muhiim ah deg degna ah ee quseeya Shirkadda Sopral. Haddii ay suurto galiwaydo waxaa fadhiga la qaban karaa maalin kale ee isla bisha Disembere 1986.

BARNAAMIJKA DOODA

1) In Shirkadda Sopral la baabiyo laguna sameeyo liquidazione.

2) In la sugo magacaabidda labadii nin oo haray fadhigii Monza Brianza ee caadiga ahaa ee 9kii bishii Settembar 1986 loo xil saaray inay hirgeliyaan go'aanadii labada dhinac ku heshiiyeen.

3) In la qeexo awooda labada liquidatore la go'aamiyana xuquuqdooda mudada ay socoto shaqadaas loo xil saaray.

4) In labadii arrimood ee lagu soo go'aamiyay shirkii caadiga ahaa ee 19.9.86 lagu hirgeliyo shirkaan aan caadiga ahayn ee kala ahaa:

b) In la baabiyo Guddiga Sare ee joogtadaa ee Maamulka Shirkadda Sopral S.P.A. lana joojiyo wixii xuquuq ah oo ay lahaayeen.

t) In la sii daayo shaqaalaha Shirkadda Sopral ayadoo laga reebayo oo kaliya in yar oo xafidda Warshadda mooyee.

5 — iyo wixii kale

GUDDOOMIYAHA SHIRKADDA SOPRAL
(Dr. Cabdullaahi Cilmi Bulbul)

AVVISO DI CONVOCAZIONE DELL' ASSEMBLEA STRAORDINARIA

Gli Azionisti della Società Prodotti Alimentari «SOPRAL» spa di cui sede Sociale a Mogadiscio, Capitale Sociale Shs. 1.000.000/= sono convocati in Assemblea Straordinaria presso la sede dello Stabilimento Spral il giorno 14 Dicembre 1986, alle ore 10 prima convocazione, ed occorrendo in seconda convocazione il giorno 15 Dicembre 1986, all astessa ora e nello stesso luogo per discutere questioni di estrema urgenza e importanza che riguarda la Società. In caso di forza maggioreil termine della riunione potrà essere prorogata una altro giorno delli stesso Dicembre, 1986.

ORDINE DEL GIORNO

1) Scioglimento e messa in liquidazione della Società Sopral SPA;

2) Conferma la nomina dei liquidatori, già convalidate nella deliberazione dell' Assemblea Ordinaria del 19.9.1986;

3) Determinazione dei Poteri dei liquidatori ed le relative remunerazioni;

4) Conferma e convalida altre determinazione dell' Assemblea Ordinaria del 19.9.1986 e in particolare:

a) Scioglimento Consglio di Amministrazione e cessazione emoiumenti o remunerazioni di componenti.
b) Risoluzione e liquidazione rapporti di lavorocon il Personale dipendenti, mantenendo in Servizio solo il minimo indispensabile di Personale.

5 — Altri

IL PRESIDENTE SOCIET & SOPRAL
(Dr. Abdullahi Elmi Bulbul)

L. 666

IIB MA GALO

FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 14aad Muqdisho, 15 Dis. 1986 L. 1 R 12

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O B N I I N

QAYBTA KOOWAAAD

S H A R C I

SHARCI L. 30 ee 16 Nof. 1986, Aftida Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya Bog. 747

QAYBTA LABAAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 33 ee 19 Nof. 1986, Xaddidaadda maalinta codbixinta doorashada Madaxweynaha J.D.S. ... 778

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 34 ee 6 Agoos. 1986, Meelmarin heshiis amaaheed dhexmaray J.D.S. iyo Hay'adda Caalamiga ee Horumarinta 778

DECREE No. 34 on 6 August 1986, Instrument of ratification 782

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 35 ee 6 Agoos. 1986, Meelmarin heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga oo maamulaysa Tas-hiilaadka Gaarka ah ee Sub-saxaraha Afrika 783

DECREE No. 35 on 6 August 1986, Instrument of rafification 784

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 17 ee 1da Dis. 1986, Sharraxaadda Madaxweynaha JDS 785

QAYBTA SADDEXAAD

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 4 Dis. 1986, Lumid 4 Jeeg war. ku qoran Mahdi Xaaji Xuseen L. 670 786

MAXKAMADDA G. J/HOOSE 10 Dis. 1986, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Nuur Kadiye Muuse Cumar .....

Sharci lambar 30, taariikh 16/11/1986

Aftida Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dim. Soomaaiya

isagoo tixgelinaya: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

XUBINTA KOOWAAD
TILMAAMO GUUD

Qod. 1aad

(Doorasho toos ah)

1. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaa afti toos ah ku dooranaya Dadweynaha.

2. Doorashadu waxay dhacaysaa ugu yaraan 30 maalmood ka hor inta ayan dhammaan muddada Madaxweynaha xilka haya, ama 60 maalmood gudahood marka ay jiraan xaaladaha ku tilmaaman Qod. 6aad, farqadda 3aad, Sharciga lambar 49 ee 23ka Dishember 1984.

Qod. 2aad
(Muddada xilka)

Sida ku tilmaaman Qod. 3, farqadda 4, Sharciga lambar 49 ee 23ka Dishember 1984, muddada xilka Madaxweynaha jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waa toddoba sano, laga bilaabo maalinta la dhaariyo.

Qod. 3aad

(Qofka wax dooran kara)

1. Waxaa cod dhiiban kara muwaadin kasta oo:

   b) Ugu yaraan ay u buuxsantay 18 sano maalinta la qabanayo doorashada;

   t) Garsoore uusan ku caddeynin waalli;

   j) Sharcigu ka xaaraantimeynin qabasho xilal guud, lagana qaadin xuquuqda doorashooyinka xukun ciqaab awgiis;

   x) Ku sugnayn xabsi xukun maxkamadeed dartiis.

2. Doortuhu wuxuu leeyahay hal cod oo qura.

3. Codku waa shakhsi, xor, toos, qarsoodi, waana loo siman yahay.

4. Doortuhu wuxuu codkiisa ku dhiiban karaa goobta uu ku sugan yahay maalinta cod-bixinta.

Qod. 4aad

(Qofka loo dooran karo xilka Madaxweynaha)

Waxaa loo dooran karaa xilka Madaweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, muwaadin kasta oo:

b) Da'diisu ay gaartay 40 sano maalinta doorashada la qabanayo;

t) Aabbihii iyo hooyadii Soomaali asal ah ay yihiin;

j) Horey aan u guursan, intuu xilka Madaxtinnimada hayeyna guursanin qof aan Soomaali asal ah ahayn;

x) Leh shuruudaha lagu dooran karo Xildhibaannada Golaha Shacbiga ee ku tilmaaman Qodobbada 4 iyo 5 ee Sharciga lambar 43 ee 1da Dishember 1979 iyo beddelaaddii ka dambaysay.

Qod. 5aad
(Qabashada doorashada)

Taariikhda la qabanayo aftida doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaa lagu xaddidayaa Xeer-Madaxweyne.

Qod. 6aad
(Goobaha Cod-bixinta)

1. Degmo kastaa waxay yeelanaysaa goobo cod-bixin.

2. Tirada goobaha cod-bixinta ee Degmada iyo meelaha laga dhisaayo waxaa xaddidaya Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, isagoo dhegeystay soo jeedinta Guddoomiyaha Maamulka dawladda ee Degmada, ugu yaraan 20 maalmood ka hor, maalinta cod-bixinta.

Qod. 7aad
(Sharaxaadda)

Qofka loo dooranayo xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaa soo sharraxaya Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

Qod. 8aad
(Habka Doorashada)

1. Qofka la soo sharraxay waxaa loo qaadayaa afti dadweyne.

2. Habka doorashadu waa "HAA iyo MAYA", oo loola jeedo in cod-bixiyuhu oggol yahay ama diiddan yahay Musharraxa.

3. Musharraxu wuxuu Madaxweyne noqonayaa haddii aqlabiyaddu ku cod-bixiyaan "HAA".

4. Haddii aqlabiyadda ku cod-bixiyaan "MAYA", Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, wuxuu soo sharraxayaa qof kale.

5. Sharraxaadda iyo doorashada cusub, waxaa loo marayaa hababka ku tilmaaman farqadaha hore ee Qodobkan iyo Qod. 7aad ee Sharcigan, doorashaduna waa in ay dhacdaa 30 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta lagu dhawaaqay natiijada aftida doorashada hore.

XUBINTA LABAAD
BANDHIGIDDA MUSHARRAXA

Qod. 9aad
(Soo gudbinta musharraxa)

1. Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, wuxuu u gudbinayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, ugu yaraan 20 maalmood ka hor, maalinta doorashada magaca qofka loo sharraxay xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

2. Soo gudbinta magaca musharraxa, waxaa la soo raacinayaa xog-warran ku saabsan da'diisa, meesha uu ku dhashay iyo taariikh nololeedkiisa.

3. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Guduhu, wuxuu musharraxa ku soo saarayaa Xeer lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Qod. 10aad
(Bandhigidda Musharraxa)

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Guduhu, wuxuu magaca musharraxa u gudbinayaa Degmooyinka dalka, si loo baahiyo loona ogeysiiyo dadweynaha, iyadoo ogeysiintaas Wasaaraddu ay u adeegsanayso qalabka warbaahinta iyo waddo kastoo kale oo kafaala-qaadaysa sida ugu habboon in warka loo gaarsiiyo muwaadiniinta, miyi iyo magaaloba.

XUBINTA SADDEXAAD
GUDDIYADA DOORASHADA

Qod. 11aad
(Hay'adaha Doorashada)

Hay'adaha doorashadu waa:

b) Guddiyada Goobaha Cod-bixinta;
t) Guddiyada doorashada ee degmooyinka iyo;
j) Guddiga Dhexe ee Doorashada.

Qod. 12aad
(Guddiyada Goobaha Cod-bixinta)

1. Guddiga Goobta Cod-bixintu waxa uu ka kooban yahay Guddoomiye iyo laba Kaaliye oo kan ugu da' weyn noqonayo Guddoomiye Ku-xigeen.

2. Guddi kastaa wuxuu yeelanayaa hal Xoghaye.

3. Guddoomiyaha, labada Kaaliye iyo Xoghayaha waxaa laga dhex magacaabayaa muwaadiniinta xaqa u leh cod-bixinta.

4. Xubnaha Guddiga iyo Xoghayaha waxaa magacaabaya, beddelayana marka loo baahdo Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Gobolka, isagoo dhegeystay Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Degmada.

5. Marka ay timaaddo baahi degdeg ah, lagama maarmaanna ay noqoto, inta ay cod-bixintu socoto, beddelaadda Kaaliyayaasha ama Xoghayaha, Guddoomiyaha Guddiga Goobta Cod-bixinta ayaa ku beddelaya qof kale oo leh shuruudaha Sharcigu uu tilmaamay.

Qod. 13aad
(Guddiga Doorashada ee Degmada)

1. Guddiga doorashada ee degmada rugtiisu waa magaalo-madaxda Degmada.

2. Guddigu wuxuu ka koobmaa Guddoomiye iyo laba Kaaliye oo ka ugu da' weyn noqonayo Guddoomiye Ku-xigeen.

3. Guddiga Doorashada ee Degmadu wuxuu yeelanayaa hal Xoghaye iyo laba qof oo u qaybsan tirada.

4. Guddoomiyaha, Kaaliyeyaasha, Xoghayaha iyo u qaybsanayaasha tirada, waxaa laga dhex magacaabayaa muwaadiniinta xaqa u leh cod-bixinta, waxaana magacaabaya, beddelayaṇa marka loo baahdo Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Gobolka isagoo dhegeystay Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Degmada.

Qod. 14aad

(Guddiga Dhexe ee Doorashada)

1. Guddiga Dhexe ee Doorashada rugtiisu waa Muqdisho wuxuuna ka koobmaa Guddoomiye, Guddoomiye-ku-xigeen iyo saddex kaaliye.

2. Guddigu wuxuu yeelanayaa hal Xoghaye iyo saddex qof oo u qaybsan tirada.

3. Guddiga Dhexe ee doorashada waxaa Guddoomiye u noqonaya Lataliye ka tirsan Maxkamadda Sare.

4. Guddoomiyaha, Guddoomiye ku-xigeenka, Kaaliyeyaasha, Xoghayaha iyo u Qaybsanayaasha tirada waxaa magacaabaya, marka loo baahdana beddelaya, Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxaana laga dhex xulayaa Muwaadiniinta xaqa u leh codbixinta.

Qod. 15aad

(Magacaabidda iyo dhaarta Xubnaha Guddiyada doorashada)

1. Magacaabidda Xubnaha Guddiyada doorashada waa in la sameeyaa, lana gaarsiiyaa dadka ay khusayso, ugu yaraan toban maalmood ka hor taariikhda codbixinta.

2. Qofna ma diidi karo xilka loo magacaabay haddii aysan jirin sabab cad oo la garowsan karo. Ka cafiska waxaa awood u leh hay'addii lahayd magacaabidda Xubinta.

3. Inta uusan xilka qaban, Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga doorashada ee Goobta ama Degmada wuxuu ku marayaa Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada hortiisa, dhaarta soo socota:

   "Waxaan Magaca Ilaahay ku marayaa in aan xilka la ii dhiibay ee la xiriira doorashada ku guto niyadsami, daacadnimo, si buuxdana u dhowro Dastuurka, Sharcigan iyo Shuruucda kale ee Dalka".

4. Xubnaha Guddiga Dhexe ee doorashadu waxay dhaartaas oo kale ku marayaan Guddoomiyaha Maxkamadda Sare hortiisa.

Qod. 16aad

(Xaaladda qaanuuneed ee Xubnaha Guddiyada)

1. Xubnaha Guddiyada doorashada oo idil waxaa loo aqoonsanayaa, inta ay wadaan hawlaha doorashada, Saraakiil Qaran.

2. Waxaan xilkaas qaban karin Guddoomiyayaasha Maamulka Dawladda ee Gobollada iyo Degmooyinka iyo Xubnaha Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Golaha Shacbiga.

XUBINTA AFRAAD
HAWLAHA GOGOLDHIGGA

Qod. 17aad

(Qalabka doorashada)

1. Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxay u diyaarinaysaa Guddi goob codbixin kasta qalabka soo socda:

   a) hal nuqul oo ah Sharcigan;

   b) koley ningaxan oo ay ku jiraan shaabadda Guddiga goobta codbixinta, khad iyo khadeeye;

   t) koley ningaxan oo ay ku jiraan xaashiyada codbixinta;

   j) sanaadiiqda codbixinta;

   x) saddex nuqul oo ah diiwaanka hawlaha doorashada ee Guddiga goobta;

   kh) diwaan lagu qoro magaca codbixiyeyaasha;

   d) shan sawir oo ah Madaxweynaha sharraxan;

   r) halkudhegyo tilmaamaya habka codbixinta;

   s) hal dhalo oo ah khadda aan tirmeyn;

   sh) buraash oo loo isticmaalo khadda aan tirmeynin;

   dh) qalab xafiis iyo wixii kale ee lagama maarmaan ah.

2. Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxay kaloo u diyaarineysaa Guddiga Dhexe iyo Guddiyada Doorashada ee Degmada qalabka soo socda:

a) hal nuqul oo ah Sharcigan;

b) koley ningaxan oo ay ku jiraan Shaabadda Guddiga Doorashada, khad iyo khadeeye;

t) saddex nuqul oo ah diiwaanka hawlaha doorashada ee Guddiga;

j) qalab xafiis iyo wixii kale ee lagama maarmaan ah.

3. Qalabka Guddiga Doorashada loogu talo galay waxaa lagu ururinayaa saxaarad gaar ah oo Wasaaradda Arrimaha Guduhu waqti habboon ku gaarsiin doonto, iyagoo xiran, ningaxan, Guddoomiyayaasha Maamulka Dawladda ee Degmooyinka.

4. Qalabka u socda Guddiga Dhexe ee doorashada waxaa toos uu gudbinaysa Wasaaradda Arrimaha Guduhu.

5. Isla mar ahaantaas, Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxay u direysaa Guddoomiyayaasha Maamulka Dawladda ee Degmooyinka, iyagoo ku jira kolay ningaxan tiro habboon oo ah xaashiyo codbixin keyd ah, looguna talo galay in la siiyo Guddiyada goobaha codbixinta kaddib marka laga helo Guddoomiyaha Guddiga codsi sababaysan.

6. Haddii ay jirto dhibaato gaar ah xagga isgaarsiinta, Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Degmadu wuxuu ku aamini karaa hal wakiil ama ka badan qayb ka mid ah xaashiyaha codbixinta kaydka ah, iyagoo ku jira kolay xiran oo ningaxan. Wakiilladu waxay xaashiyahaas diyaar ula ahaanayaan Guddoomiyayaasha Guddiyada Goobaha Codbixinta ku yaal meelaha ka fog xarunta Degmada.

Qod. 18aad

(Shaabadda, diiwaanka iyo sanaadiiqda)

1. Shaabadaha Guddiyada doorashada, diiwaannada iyo sanaadiiqda codbixinta waa isku nooc Dalka oo idil.

2. Shaabaduhu waxay leeyihiin lambar mideysan oo ku socda tiro taxan.

Qod. 19aad

(Xaashiyaha Cod-bixinta)

Xaashiyaha codbixintu waxay ka samaysan yihiin warqad cad oo bolleetooyin laga jari karo ku dheggan, midkiina boqol xaashi ku yaalliin. Cadka ku haraya bolleetada wuxuu leeyahay lambar u gaar ah oo ku socda tiro taxan.

Qod. 20aad

(Ilxirrada iyo sanaadiiqda codbixinta)

1. Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Degmadu waa in uu ka diyaariyaa goob codbixin kasta laba ilxir. Ilxirradu waa in ay u samaysnaadaan si kafaala qaadeysa qarsoodiga codbixinta.

2. Ilxir kasta gudihiisa waa in la dhigaa laba sanduuq oo mid buluug yahay, looguna talo galay in lagu rido xaashiyaha codbixinta ee oggol musharraxa, kan kalana uu hurdi yahay, looguna talo galay in lagu rido xaashiyaha codbixinta ee diiddan musharraxa.

3. Sanduuqa buluugga ah dushiisa waa in lagu dhigaa **"HAA"**, kan hurdiga ahna **"MAYA"**.

Qod.21aad

(Gaarsiinta qalabka Guddiyada doorashada)

1. Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Degmadu waa in uu lixda subaxnimo ka hor maalinta doorashada gaarsiiyaa qalabka doorashada Guddi goob codbixin kasta, kuna dhiibaa goobta Guddigu uu mas'uul ka yahay.

2. Sidoo kale Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Degmadu waa in uu dhiibaa inta ka horreysa 4ta galabnimo ee isla maalintaas qalabka u socda Guddiga Doorashada ee Degmada.

3. Wuxuu kaloo guddi doorasho kasta gaarsiinayaa nuqul ah warqadda magacaabidda Xubnaha Guddiga.

XUBINTA SHANAAD

CODBIXINTA

Qod. 22aad

(Dhismaha Guddiga Codbixinta ee goobta)

1. Guddoomiyaha Guddiga Goobta Codbixintu markii uu helo qalabka ku tilmaaman qodobka hore, wuxuu:

   a) ku dhaqaaqaya dhisidda Guddiga isagoo u yeeraya in ay ka soo qayb galaan Kaaliyeyaasha iyo Xoghayaha;

   b) kaddib markuu hubsado, tusana Xubnaha kale dhamida ningaxa saaran, wuxuu furayaa saxaaradda wuxuuna hubinayaa qalabka ku jira;

   t) furayaa koleyada ay ku jiraan shaabadda Guddiga iyo xaashiyaha codbixinta kaddib markuu hubiyo, tusana Xubnaha kale dhaamida ningaxa saaran koleyadaas;

   j) hubinayaa sanaadiiqda codbixintu in ay maran yihiin, kaddibna waa uu xirayaa, ningaxayaana isagoo u dhaafaya keliya daloolka looga ridayo xaashida codbixinta:

   x) dhejinaya sawirka musharraxa.

   kh) dhejinaya hal-ku-dhegyo tilmaamaya habka codbixinta.

2. Hawlaha kor ku xusan waxaa lagu qorayaa diiwaanka, iyadoo la tilmaamayo lambarka u gaarka ah shaabadda Guddiga goobta codbixinta iyo tirada xaashiyaha codbixinta loogu tala galay doorashada.

3. Hawlahaasi marka ay dhammaadaan, Guddoomiyuhu wuxuu ku dhawaaqayaa furitaanka codbixinta.

Qod. 23aad

(Awoodda ilaalinta nabadgelyada ee Guddoomiyaha)

1. Guddoomiyaha Guddiga Goobta Codbixintu wuxuu u xilsaaran yahay ilaalinta nabadgelyada hawlaha doorashada, wuxuuna adeegsan karaa Ciidammada Nabadgelyada si loo fogeeyo qofkii dhibaato u geysanaya habsamida hawlaha doorashada.

2. Ciidanka Nabadgelyadu wuxuu ku geli karaa goobta idanka Guddoomiyaha oo keliya.

3. Hawlwadeennada Hay'adaha Dawladda iyo Taliyeyaasha Ciidammada Nabadgelyadu waxay fulinayaan awaamiirta Guddoomiyaha si loogu suurtageliyo doortayaasha gelitaanka goobta loogana ilaaliyo agagaarkeeda hor dhoobasho sabab la'aan ah.

4. Awoodda kor ku xusan kuwo la mid ah waxaa leh Guddoomiyayaasha Guddiyada doorashada ee Degmada iyo Guddoomiyaha Guddiga Dhexe ee doorashada.

Qod. 24aad

(Gelitaanka Goobta)

1. Xubnaha Guddiga ka sokow, goobta waxaa geli kara oo keliya codbixiyaha.
2. Codbixiyeyaashu waxay goobta u gelayaan midmid iyagoo isu xigsanaya sida ay u soo kala horreeyaan. Hase yeeshee waxaa horumar leh qof kasta oo haya xil la xiriira hawlgelinta doorashada.

3. Codbixiyeyaashu lama soo geli karaan goobta hub ama qalab kale oo wax dhibi kara.

Qod. 25aad

(Oggolaanshaha codbixinta)

1. Codbixiye kasta wuxuu codbixin karaa kaddib:
   a) markuu caddeeyo magiciisa oo dhan iyo da'diisa;
   b) Guddigu u aqoonsado in uu yahay qof leh xaqa codbixinta. Go'aankaas Guddigu wuxuu ku gaarayaa hab gaaban iyo si deg deg ah iyadoo la tixgelinayo qoraallo, markhaati iyo wixii kale oo caddeyn waxtar leh ah.
2. Gacanta bidixda, ama haddii aysan jirin tan midigta, amaba, haddii labaduba maqan yihiin, meel kaloo la arki karo oo jirkiisa ka mid ah, waa in calaamad muuqata oo ah khadda aan tirmin laga mariyaa codbixiyaha inta aan la siin xaashida codbixinta.

Qod. 26aad

(Doortayaasha aan codbixin karin qof ahaan)

1. Waxaa codbaxsanaya qofkii xaq u leh ee yimaada qof ahaan goobta codbixinta.
2. Qofka, iin jir oo ka muuqata awgeed, aan codbixin karin, wuxuu Guddoomiyuhu u oggolaanayaa inuu kaalmeeyo qof kale oo Codbixiyuhu ku kalsoon yahay.
3. Xoghayuhu waa in uu ku qoraa diiwaanka, isagoo tilmaamaya sababta loogu oggolaaday, magaca qofkaas iyo kan kaalmeeyey.

Qof. 27aad

(Habka codbixinta)

1. Marka ay dhammaadaan hawlaha ku xusan Qodobka 25aad, Guddoomiyuhu wuxuu mid mid ugu dhiibayaa qof kasta oo cod bixinaya hal xaashi codbixin oo la shaabbadeeyey, loogana soo jaray bolleetada sida ay isu lambaro xigaan.
2. Codbixiyuhu wuxuu la aadayaa ilxirrada codbixinta loo sameeyey midkood.
3. Codka oggolaashaha Musharraxa waxaa loo dhiibanayaa xaashida codbixinta oo lagu rido sanduuqa buluugga ah, kan diidmadana sanduuqa hurdiga ah.
4. Haddii codbixiyuhu uu arko in xaashida la siiyey xun tahay ama ayan dhammeyn wuxuu Guddoomiyaha weydiisan karaa mid kale isagoo soo celinaya tii hore. Arrintaasna waa in lagu qoraa diiwaanka.
5. Guddoomiyuhu wuxu amri karaa in laga fogeeyo goobta codbixiyeyaasha ulakac ugu raaga codbixinta, iyadoo laga soo celinaayo xaashida la siiyey. Hase yeeshee waa in loo oggolaadaa in ay codbixiyaan inta taagan marka ay dhammaadaan kaddib.
6. Guddoomiyuhu, haddii uu la kulmo qof haysta xaashiyo codbixin oo dheeraad ah ama kuwo ka duwan nooca la isticmaalayo amaba uu hore u codbixiyey, wuxuu ka qaadayaa xaashiyaha uu haysto wuxuuna deg deg ugu dhiibayaa ciidammada Nabadgelyada si loo hor geeyo Maxkamad, looguna qaado dacwad ciqaabeed. Arrintaas waa in lagu qoraa diiwaanka.

Qod. 28aad

(Saacadaha codbixinta)

1. Hawlaha codbixintu waxay soconayaan hal maalin, laga bilaabo 7da aroornimo ilaa 6da fiidnimo.
2. Hase yeeshee Codbixintu waa in ay socotaa ilaa iyo inta laga dhammeynayo doortayaasha goobta taagan.

Qod. 29aad

(Gabagabada hawlaha goobta Codbixinta)

Marka la dhammeeyo hawlaha ku xusan qodobbada sare, Guddoomiyuhu wuxuu ku dhaqaaqayaa, hakad la'aan, hawlaha soo socda:

1. Wuxuu ku dhawaaqayaa codbixinta doorashadu in ay xiran tahay.
2. Wuxuu xirayaa, ningaxayaana sanaadiiqda codbixinta, ningaxa dushiisa waxaa lagu dhufanayaa shaabadda goobta doorashada, waxaana saxiixaya Guddoomiyaha iyo Xubnaha kale ee Guddiga.
3. Wuxuu hubinayaa, diiwaankana ku qorayaa tirada xaashiyaha codbixinta ee la isticmaalay isagoo ka eegaya bolleetayaasha laga jaray jeexyada ku haray.
4. Wuxuu hubinayaa, diiwaankana ku qorayaa tirada xaashiyaha codbixinta ee looga qaaday codbixiyeyaasha:
   a) iyagoo xumaa ama aan dhammeyn awgood;
   b) iyadoo codbixiyeyaasha lagu helay xaashiyo codbixin ee aan waafaqsanayn kuwa sharciga ah;
   t) iyadoo codbixiyeyaasha lagu helay hal xaashi codbixin wax ka badan;
   j) Iyadoo la ogaaday in ay horey u codbixiyeen.

5. Wuxuu hubinayaa diiwaankana ku qorayaa tirada xaashiyaha codbixinta ee aan la isticmaalin.
6. Wuxuu hubinayaa diiwaankana ku qorayaa isagoo sal ka dhigaya waxyaabaha kor lagu soo sheegay tirada dadka run ahaantii codbixiyey.
7. Wuxuu xirayaa diiwaanka hawlaha goobta codbixinta.
8. Wuxu daabacyadaas kor ku xusan ku ridayaa koleyada u gaarka ah, kuwaasoo uu u xirayo una ningaxayo sida ku xusan lambarka 2aad ee qodobkan.
9. Wuxuu ku ridayaa shaabadda goobta codbixinta koleyga loogu tala galay, ningaxa dushiisana waxaa la saarayaa saxiixyada ku tilmaaman lambarka 2aad ee qodobkan.
10. Wuxuu koleyada ku ridayaa saxaarad uu xirayo, ningaxayana, ningaxa dushiisa waxaa la saarayaa saxiixyada ku tilmaaman lambarka 2aad.
11. Wuxu saxaaradda raacinayaa sanaadiiqda codbixinta.

Qod. 30aad

(Joogista dhammaan Xubnaha Guddiga Goobta Codbixinta)

Muddada ay socdaan hawlaha goobta codbixintu, dhammaan Xubnaha Guddigu waa in ay joogaan. Waxaa la oggol yahay maqnaasho gaaban, markiiba hal qof, iyadoo oggolaansho laga haysto Guddoomiyaha Guddiga.

Qod. 31aad

(Diiwaanka Guddiga Goobta Codbixinta)

Diiwaaneynta hawlaha Guddiga Goobta Codbixinta waa in laga sameeyo saddex nuqul oo ay wada saxiixaan dhammaan Xubnaha Guddiga Goobta Codbixintu. Laba nuqul oo ay la socdaan dhammaan lifaaqyada isaga ku xusan waxaa loogu tala galay Guddiga Doorashada ee Degmada, kan saddexaadna Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Degmada.

Qod. 32aad

(Qaadidda iyo dhiibidda qalab goobta)

Mar alla markay dhammaadaan hawlaha ku tilmaaman qodobbada sare, Guddoomiyuhu, isagoo la socdaan ugu yaraan Xubin ka mid ah Guddiga Goobta Codbixinta ayna ilalinayaan Ciidammada Nabadgelyadu, wuxuu deg deg u qaadanayaa una geynayaa Guddiga Doorashada ee Degmada saxaaradda ay ku jiraan qalabka ku tilmaaman Qod. 29aad iyo sanaadiiqda codbixinta. Guddiga Doorashada ee Degmadu waa in uu hubiyaa dhammida ningaxa, lagana qoraa caddeyn laba nuqul ah oo mid uu qaato Guddoomiyaha Guddiga Goobta Codbixinta, midka kalena Guddiga Doorashada ee Degmada. Guddoomiyaha Guddiga Goobta Codbixinta waa in uu isla waqtigaas u dhiibaa Guddoomiyaha Maamulka Dawlada ee Degmada hal nuqul oo ah Diiwanka Goobta Codbixinta.

XUBINTA LIXAAD

HAWLAHA GUDDIGA DOORASHADA EE DEGMADA

Qod. 33aad

(Dhisidda Guddiga Doorashada ee Degmada)

Marka la helo qalabka ku tilmaaman Qodobka 17/2, Guddoomiyaha Guddiga Doorashada ee Degmadu:

1. Wuxuu ku dhaqaaqayaa dhisidda Guddiga Doorashada ee Degmada, isagoo ugu yeeraya in ay ka soo qayb galaan Kaaliyeyaasha, Xoghayaha iyo u qaybsanayaasha tirada.
2. Markuu xaqiijiyo, tusana xubnaha kale ee Guddiga dhammida ningaxa, wuxuu furayaa saxaaradda, ka soo saarayaa hubinayaana qalabka ku jira.
3. Markuu xaqiijiyo tusana xubnaha kale dhammida ningaxa, wuxuu furayaa koleyga ay ku jirto shaabadda Guddiga, wuxuuna ku qorayaa lambarkeeda diiwaanka.
4. Wuxuu qalabka kale u dhiibayaa Xoghayaha Guddiga Doorashada Degmada.
5. Kaddib Guddigu wuxuu dhowrayaa in ay soo gaaraan qalabka ku tilmaaman Qodobka 32aad.

Qod. 34aad

(Qabashada qalabka goobta doorashada)

Qabashada saxaaradaha iyo sanaadiiqda goobaha codbixinta, Guddiga doorashada ee Degmadu wuxuu u raacayaa habka ku tilmaaman lambarka 2aad ee Qod. 33aad iyadoo loo kala hormarinaayo sida loo kala horreeyay.

Qod. 35aad

(Xiridda Xafiiska Guddiga Doorashada ee Degmada)

Xafiiska Guddiga Doorashada ee Degmada lama xiri karo ka hor inta aysan soo gaarin ama aysan tirsan dhammaan qalabka goobaha codbixinta ee Degmada.

Inta uu xiran yahay Xafiisku, qofna kuma jiri karo gudihiisa, ilaalintiisana waxaa Guddoomiyuhu u xilsaarayaa Ciidanka Nabadgelyada oo dibadda ka ilaalinaya.

Qod. 36aad

(Bilowga hawlaha tirinta)

Hawlaha tirintu waxay billaabanayaan 8da subaxnimo ee maalinta xigta tan codbixinta. Lama billaabi karo tirinta goob codbixin ilaa iyo inta ay ka dhammaanayaan hawlaha midda socota markaas ee faraha lagula jiro. Inta aan la billaabin tirinta goob codbixin, Guddoomiyuhu wuxuu kaloo hubinayaa dhammida ningaxyada koleyda saxaaradda, isagoo hubinaya dhammida ningaxyada koleyada ku jira iyo kuwa sanaadiiqda codbixinta.

Guddoomiyuhu, kaddib markuu ku dhawaaqo lambarka u gaarka ah goobta codbixinta iyo meesha ay ku tiil, wuxuu koleyga ka soo saarayaa diiwaanka goobtaas wuxuuna ku dhawaaqayaa tirada dadka dhab ahaan ka codbixiyey goobta sida ku cad isla diiwaankaas.

Qod. 37aad

(Kala shaandheynta xaashiyaha codbixinta)

1. Marka ay dhammaadaan hawlaha ku xusan qodobka hore, Guddoomiyuhu kaddib marka uu ka gooyo ningaxa, wuxuu furayaa sanaadiiqda buluugga ah oo ay ku jiraan xaashiyaha codbixinta ee oggolaaday Musharraxa.

2. Wuxuu ku dhaqaaqayaa hubinta iyo tirinta kuwa oggol musharraxa iyadoo marba hal xaashi la soo qaadayo. Hawlahaas kaddib xaashiyaha ansaxa ah waxaa lagu celinayaa sananadiiqdoodii kuwa aan ansaxa ahaynna waxaa lagu ridayaa koley gaar ah.
3. Kaddib marka uu kaga gooyo ningaxa Guddiga hortiisa, Guddoomiyuhu wuxuu furayaa sanaadiiqda hurdiga ah oo ay ku jiraan xaashiyaha codbixinta ee diiday Musharraxa iyadoo la raacayo habka ku xusan lambarka hore.

Qod. 38aad

(Xaashiyaha codbixinta ee aan ansaxa ahayn)

Waxaan ansax ahayn xaashiyaha codbixinta oo ay ka maqan yihiin shaabadda goobta codbixinta iyo kuwa ay ku yaalliin saxiix, magac ama calaamado kale ee uu gacantiisa ku qoray codbixiyuhu.

Qod. 39aad

(Wada joogista dhammaan xubnaha Guddiga)

Muddada ay socdaan hawlaha tirinta xaashiyaha codbixintu, dhammaan xubnaha Guddiga Doorashada ee Degmadu waa in ay wada joogaan.

Waxaa laysu oggol yahay maqnaasho gaaban oo sabab laga garaabi karo leh, markiiba hal qof, iyadoo oggolaasho laga haysto Guddoomiyaha.

Qod. 40aad

(Baarista cabashada iyo go'aannada)

Marka ay dhammaadaan hawlaha kala shaandheynta xaashiyaha codbixintu Guddiga Doorashada ee Degmadu wuxuu baarayaa wixii cabasho ah ee la xiriira

doorashada oo ku soo gaaray si qoraal ah inta ay socotay codbixinta iyo kaddibba, wuxuuna Guddigu go'aan kaga gaarayaa cod hal dheeri ah.

Qod. 41aad

(Hubinta natiijada goobta doorashada)

Marka ay dhammaadaan hawlaha ku xusan qodobbada hore, Guddoomiyaha Guddiga Doorashada ee Degmadu wuxuu:

1. Xaqiijinayaa wixii is khilaaf ah ee u dhexeeya tirada u soo baxday Guddiga Doorashada iyo tan ku qoran diiwaanka Guddiga Goobta codbixinta isagoo muujinaya, haddii ay jiraan, sababaha keenay.
2. ku dhawaaqayaa tirada guud ee codbixiyeyaasha, xaashiyaha codbixinta ee ansaxay iyo kuwa aan ansixin.
3. Ku dhawaaqayaa natiijada doorashada isagoo kala sheegaya tirada codadka oggolaaday iyo inta diidday.
4. Ku qorayaa arrimaha kor ku xusan oo idil diiwaanka Guddiga Doorashada ee degmada.

Qod. 42aad

(Dib-u-dhigidda kala shaandheynta)

Hawlaha la xiriira kala shaandheynta xaashiyaha codbixinta ee goobta, mar haddii la billaabo waa in la dhammeystiraa iyadoo aan la kala joojin.

Haddii hawlaha Guddiga lagu dhammeystiri waayo maalintaas gudaheeda, Guddoomiyuhu wuxuu dib ugu dhigayaa 8da subaxnimo ee maalinta xigta.

Qod. 43aad

(Isugeynta natiijada doorashada)

Marka la dhammeeyo hawlaha kor ku xusan, Guddoomiyuhu wuxuu:

1. Tirinayaa guud ahaan inta ka codbixisay dhammaan goobaha codbixinta ee degmadu u qaybsan tahay, xaashiyaha codbixinta ee ansaxay, kuwa aan ansxin, codadka oggolaaday iyo kuwa diiday musharraxa.

2. Caddeynayaa natiijada ku meel gaarka ah ee ka soo baxday degmada isagoo u kala saaraya tirada oggolaatay iyo tirada diidday.

3. Ku ogeysiinayaa natiijadaas taar ku qoran lambar iyo farba Guddiga Dhexe ee doorashada.

4. Ka buuxinayaa diiwaan saddex nuqul ah hawlaha laga qabtay goobaha codbixinta ee degmada iyo natiijada ka soo baxday, iyadoo ay wada saxiixayaan dhammaan xubnaha Guddigu. Nuqullada diiwaankaas waxaa loo qaybinayaa sida ku xusan Qod. 44aad ee Sharcigan.

Qod. 44aad

(Xiritaanka hawlaha Guddiga doorashada ee Degmada)

1. Marka la dhammeeyo hawlaha kor ku tilmaaman, Guddoomiyaha Guddiga Doorashada ee Degmadu wuxuu:

   a) u dirayaa Guddiga Dhexe ee doorashada nuqulka koowaad ee diiwaanka ku xusan Qod. 43aad iyadoo ay la socdaan nuqullada koowaad ee dhammaan diiwaannada guddiyada goobaha codbixinta ay degmadu u qaybsaneyd iyo wixii cabasho qoraal ah ee soo gaaray intii ay socdeen hawluhu;

b) u dirayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha nuqulka labaad ee diiwaanka ku tilmaaman Qod. 43aad.

2. Qalabka intiisa kale oo ay la jiraan nuqullada saddexaad ee diiwaannada ku tilmaaman Qod. 43aad waxaa loo gudbinayaa Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Degmada isagoo ka reebaya caddeyn.

XUBINTA TODDOBAAD HAWLAHA GUDDIGA DHEXE EE DOORASHADA

Qod. 45aad

(Dhismaha Guddiga Dhexe eeDoorashada)

1. Guddoomiyaha Guddiga Dhexe ee Doorashadu kaddib markuu helo qalabka ku tilmaaman Qod. 17/2, wuxuu ku dhaqaaqayaa:

   a) dhisidda Guddiga isagoo ugu yeeraya in ay ka soo qayb galan Guddoomiye ku-xigeenka, kaaliyeyaasha, Xoghayaha iyo ku qaybsanayasha tirada;

   b) kaddib markuu arko tusana Xubnaha kale dhammida ningaxa, wuxuu furayaa saxaaradda kana soo saarayaa qalabka ku jira;

   t) kaddib markuu arko, tusana xubnaha kale dhammida ningaxa, wuxuu furayaa koleyga ay ku jirto shaabadda guddiga, lambarkeedana ku qorayaa Diiwaanka;

   j) u gudbinayaa qalabka intiisa kale Xoghayaha.

2. Guddiga Dhexe ee doorashadu wuxuu sugayaa soo gudbinta diiwaannada ku xusan Qod. 44aad oo ka soo gaaraya Guddiyada Doorashada ee degmooyinka.

Qod. 46aad

(Ku dhawaaqidda natiijada doorashada)

1. Kaddib markuu helo diiwaannada Guddiga Doorashada ee degmooyinka oo idil, Guddoomiyaha Guddiga Dhexe ee doorashadu wuxuu ku dhaqaaqayaa hawlaha soo socda:

a) wuxuu go'aan ka gaarayaa cabashooyinka laga soo qaatay habka codbixinta iyo tirinta;

b) wuxuu tirinayaa guud ahaan codadka ansaxa ah, kuwa aan ansaxa ahayn, codadka oggolaaday iyo kuwa diiday Musharraxa.

2. Kaddib Guddoomiyaha Guddigu wuxuu ku dhawaaqayaa natiijada kama dambeysta ah ee aftida doorashada, wuxuuna natiijadaas gaarsiinayaa dadweynaha isagoo adeegsanaya qalabka warbaahinta.

Qod. 47aad

(Diiwaanka hawlaha Guddiga Dhexe ee Doorashada)

1. Diiwaanka hawlaha Guddiga Dhexe ee Doorashada waxaa laga samaynayaa saddex nuqul oo kan koowaad loo dirayo Madaxweynaha Jamhuuriyadda, kan labaadna Xisbiga.

2. Qalabka intiisa kale oo uu ku jiro nuqulka saddexaad ee diiwaanka waxaa lagu wareejinayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxaana lagala harayaa caddeyn.

Qod. 48aad

(Faafinta natiijada doorashada Madaxweynaha)

Guddoomiayaha Guddiga Dhexe ee Doorashadu wuxuu ku soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, shan maalmood gudahood, laga billaabo maalinta ku dhawaaqidda, natiijada kama dambeysta ah ee doorashada.

XUBINTA SIDDEEDAAD
CIQAABAAD

Qod. 49aad
(Is-hortaagid bandhigidda dooraahada)

Haddii uusan falku dembi ka weyn keeneynin, qof kastoo dariiqad kasta ku hor istaaga ama carqaladeeya shirarka ama bandhigyada doorashada ama is-hortagga meel ku dhejin halkudhegyo la xiriira doorashada, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ilaa saddex sano ah ama ganaax ilaa 30.000 Shilin Soomaali ah.

Qod. 50aad
(Ku xadgudub xorriyadda doorashada)

1. Haddii uusan falku dembi ka weyn keeneynin, qof kasta oo ku xadgudba xorriyadda doorashada, isagoo codbixiyaha u ballanqaadaya ama siinaya lacag, wax qiimo ama waxtar gaar ahaaneed leh, ama u ballanqaadaya ama siiya shaqo dawladeed ama mid gaar ahaaneed, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa saddex sano oo xabsi ah ama ganaax ilaa 30.000 Shilin Soomaali.

2. Qofkii, si uu u gaaro ujeeddooyinka kor ku xusan, isticmaala xoog, handadaad, khiyaamo ama indhasarcaadid, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa afar sano oo xarig ah iyo ganaax dhan 40.000 Shilin Soomaali.

Qod. 51aad
(Is-hortaagid habsami u socoshada hawlaha codbixinta iyo kala shaandheynta)

Hadii uusan falku keeneynin dembi ka weyn, qof kasta oo isagoo isticmaalaya handadaad ama falal xoog ah, is hortaaga madaxbannaani u baxsashada codka ama

tarqaladeeya habsami u socoshada doorashada, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ilaa afar sano ah ama ganaax ilaa 40.000 shilin soomaali ah.

Qod. 52aad

(Idan la'aan ku soo gelid goobaha iyo xafiisyada doorashada)

Haddii uusan falku dembi ka weyn keeneynin, qof kasta oo, isagoo ogsoon inuusan xaq u lahayn, inta ay socdaan hawlaha codbixintu, soo gala goobaha ama xafiisyada doorashada ama ku hakada, isagoo laga dalbaday in uu isaga baxo, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ilaa hal bil ah ama ganax ilaa 1.000 shilin soomaali.

Qod. 53aad

(Codbixin xadgudub ah)

1. Qof kasta oo, isagoo ogsoon inuusan xaq u lahayn codbixin ama isagoo sheeganaya magac qof kale, codbixin u yimaadda ama bixiya hal cod wax ka badan, amase isagoo u xilsaaran in uu u codbixiyo qof aan shakhsi ahaan codbaxsan karin, ugu codbixiyo si ka duwan sidii la faray, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ilaa laba sano ah ama ganaax ilaa 24.000 shilin soomaali.

2. Isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya qofkii si been ah ugu marag kaca aqoonsiga qof kale oo codbixinaya ama lagu helo isagoo haysta xaashiyo codbixin ee ka duwan kuwa Sharciga ah.

Qod. 54aad

(Been abuurid, xadid qoraallo ama wax ka beddelid)

Haddii uusan falku dembi ka weyn keeneynin, qof kasta oo been abuura xaashiyaha codbixinta ama war-

qado kale oo la xiriira hawlaha doorashada ama wax ka beddela, xada ama jeexjeexa qayb ama gebi ahaan warqadahaas midkood, amase ogaan u isticmaala warqadahaas beenta ah, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa laba sano oo xarig ah ama ganaax ilaa 24.000 shilin soomaali ah.

Qod. 55aad

(Diidid sabab la'aan Xubin ka noqosho Guddiyada Doorashada)

Qof kasta oo, isagoo loo magacaabay xilka xubinnimada guddiyada doorashada, sabab la'aan diida xilkaas ama ka maqnaada fadhiyada guddiyada, ama isaga taga, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa hal sano oo xarig ah ama ganaax ilaa 20.000 shilin soomaali ah.

Qod. 56aad

(Xad-gudubyada kale ee loo geysto Sharciga)

Qof kasta oo jebiya awaamiirta Sharcigan ku xusan, ciqaab gaar ah haddii aan loogu talo gelin, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa lix bilood oo xarig ah ama ganaax ilaa 10.000 shilin soomaali ah.

Qod. 57aad

(Dhumid xaqa doorashada)

1. Muwaadin kasta oo gala dembiyada ku xusan sharcigan, laguna xukumo xarig aan ka yareyn 2 sano, waxaa ka lumaya xaqa doorashada muddo 5 sano ah.

2. Dacwadaha la xiriira dembiyada sharcigan ku xusan waxaa loo qaadayaa si degdeg ah waxaaana awood u leh Maxkamadaha caadiga ah.

XUBINTA SAGAALAAD
QODOBBO GABAGABO AH

Qod. 58aad
(Xilka Xisbiga)

1. Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, isagoo adeegsanaya Hoggaamada, Guddiyada, Wakiillada, Xoghayayaasha Xisbiga ee Gobollada iyo Degmooyinka iyo Hay'adihiisa kale, wuxuu mas'uul ka yahay abaabulka iyo kicinta dadweynaha.

2. Xoghayayaasha Xisbiga ee gobolladu waxay kormeerayaan si toos ahna u hubinayaan in hawlaha doorashada ee gobolladu ku dhammaadaan muddadii iyo habkii loo dejiyey. Isla xilkaas oo heer degmo ah waxa uu saaran yahay Xoghayayaasha Xisbiga ee degmooyinka.

Qod. 59aad
(Mas'uuliyadda Ciidammada Nabadgelyada)

Nabadgelyada iyo xasilloonida socodka hawlaha doorashada waxaa ka mas'uul ah Ciidammada Nabadgelyada iyagoo raacaya awaamiirta iyo tusaalooyinka Guddoomiyayaasha Maamulka Dawladda ee gobollada iyo degmooyinka iyo Guddoomiyeyaasha guddiyada doorashada.

Qod. 60aad
(Dhaqangal)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelaya isla maalinta uu saxiiso Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saaraya Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 16/11/1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 33 ee 19 Nof. 1986: Xaddidaadda maalinta Codbixinta doorashada Madaxweynaha JDS.

MARKUU ARKAY Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY Qodobbada 1, faqradda 2 iyo 5 ee Sharciga lambar 30, taariikh 16ka Nofember 1986;

MARKUU TIXGELIYEY In ay lagama maarmaan tahay in la xadido maalinta codbixinta;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa la qabanayaa 23ka Disember 1986da.

Qod. 2aad

Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxay hawlgalka la xiriira fulinta tilmamaha ku xusan Sharciga lambar 30 ee 16ka Disember 1986 ku habeyneysaa taariikhda Qodobka 1aad ee Sharcigan lagu xaddiday.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixay Madaxweynuhu waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 19.11.1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 34/86 ee 6da Agoosto 1986: Meelmarin heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caalamiga ee Horumarinta.

MARKUU ARKAY Qod. 67, faqradda 5 iyo Qod. 82, faqradda 4 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 49 ee 23ka December 1984 oo ku saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY Sharciga lambar 25 ee 6da Agoosto 1986 oo Golaha Shacbiga, Guddigiisa Joogtada ahi, uu ku oggolaaday Heshiiska kor ku timaaman;

MARKUU TIXGELIYEY In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiis Amaaheed ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Calamiga ee Horumarinta oo lagu kala saxiixday magaalada Washington D.C. taariikhdu markey ahayd 24 Juunyo 1986, kuna saabsan barnaamijka habeynta Qaybta Beeraha.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ku yeelanayaa astaan sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 6da Agoosto 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Decree No. 34 of August 6, 1986:
Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN the Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN the Law No. 49 of 23 December 1984;

HAVING SEEN the Law No. 25 of 6 August 1986 on the base of which the People's Assembly approved the Agreement specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED the necessity to retify this Agreement;

HEREBY PROMULGATES

the following Decree:

Article 1

The Development Credit Agreement (Agricultural Sector Adjustment Program) between Somali Democratic Republic and International Development Association, signed in Washington D.C. on 24 June 1986, is hereby ratified.

Article 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of the Somali Democratic Republic.

Article 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 6 Agust, 1986

THE PRESIDENT OF S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 35 ee 6da Agoosto 1986: Meelmarin heshiis amaaheed oo dhexmaray JDS iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga oo maamuleysa Tas-hiilaadka gaarka ah ee Sub-saxaraha Afrika.

MARKUU ARKAY — Qod. 82aad ee Dastuurka iyo Qodobka 67aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY — Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984 oo ku saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY — Sharciga lambarkiisu yahay 26 ee 6da Agoosto 1986 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu uu ku oggolaaday Heshiiska kor ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY — In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiis amaaheed ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga oo maamuleysa Tas-hiilaadka gaardka ah ee Sub-saxaraha Afrika oo lagu kala saxiixday magaalada Washigton D.C. taariikhdu markay ahayd 24 Juunyo 1986, kuna saabsan Barnaamijka Habeynta Qaybta Beeraha.

Qod. 2aad

Heshiisku wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ku yeelanayaa astaan sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 6da Agoosto 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Decree No. 35 of August 6, 1986:
Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN the Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN the Law No. 26 of August 6, 1986, on the base of which the People's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED the necessity to ratify this agreement;

HEREBY PROMULGATES

the following Decree:

Article 1

The African Facility Credit Agreement (Agricultural Sector Adjustment Program) between Somali Democratic Republic and International Development Association as Administrator of the Special Facility for Sub-saharan Africa, signed in Washigton D.C. on 24 June 1986, is hereby ratified.

Article 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of the Somali Democratic Republic.

Article 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be published in Official Bulletin of the State.

Mogadiṣhu, 6 Agust, 1986

THE PRESIDENT OF S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

Xeer Wasaaradda Arr. Gudaha L. 17, ee 1da Dis. 1986: Sharraxaadda Madaxweynaha JDS

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

MARKUU ARKAY Sharciga lambar 14 ee 3da Juun 1962 ee ku saabsan Nidaamka Dawladda iyo beddelaadyadii ka dambeeyey;

MARKUU ARKAY Go'aanka Golaha Dhexe Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ee Kalfadhigiisii afraad ee Setenber 1986, kuna saabsanaa u sharrixidda Jaalle Maxamed Siyaad Barre xilka Madaxweynaha JDS;

ISAGOO CUSKANAYA Qodobka 9aad, Sharciga lambar 30 ee 16ka Noofember 1986;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaalle MAXAMED SIYAAD BARRE, Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaa mar labaad loo sharraxay Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya madasha 1987 — 1993, waxaana Aftida Doorashada Madaxweynaha la qabanayaa, sida ku tilmaaman Xeerka Madaxweynaha lambar..... taariikhda 19ka Noofember 1986, taariikhdu markay tahay 23ka Disember 1986.

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maanta, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.12.1986

AXMED SULEYMAAN CABDALLA
(Wasiirka Arrimaha Gudaha)

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir.

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Mahdi Xaaji Xuseen

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegag/War. Lrs. 166423, 166424, 166426, 166427 kuna jirto lacag dhan min 100.000, isugeyn guud 400.000, kuna qoran magaca J/le Mahdi Xaaji Xuseen.

Sida ku cad warqadda lam. 12662 ee Tr. 4/12/86, ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Xis-guud.

MARKUU ARKAY: Qod. 69 Sharci Lr. 2 ee Tr. 9/9/1962dii

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeegag/War. Lrs. 166423, 166424, 166426, 166427 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo kaydka Soomaaliyeed, laanta 3aad kuna jirto lacag dhan isugeyn guud 400.000 kuna qoran magaca J/le Mahdi Xaaji Xuseen.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta 3aad in ay siiso J/le Mahdi Xaaji Xuseen, lacagta cadaddeedu tahay 400.000 oo ah beddelkii Jeeg/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka imaan ama la keenin.

Muqdisho, 4/12/86
Kaaliyaha Maxkamadda:
C/Qaadir Cali Xaaji

Gudd. Max. G/Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole

MAXKAMADDA GOBOLKA JUBBADA HOOSE
Lr. 162 - 10 Disember 1986

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G.J. HOOSE

HADDUU ARKAY: Arjigan uu soo qortay Nuur Kadiye Muuse Cumar

HADDUU ARKAY: In ay dhumeen 2 Jeeg Wareega lambarradoodu kala yihiin 0089856 ee 2/6/86, kuna qoran tahay lacag dhan 50.000 Sh. So. iyo Lr. 452408 ee 2/6/86 kuna qoran tahay lacag dhan 20.000 Sh. So. labaduna ay ka soo baxeen Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo.

HADDUU ARKAY: Qoraalka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo ee 5.6.86.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam 2 ee 9.9.1962

WUXUU GO'AAMIYEY

In loo cusbooneysiinayo Jeegaggaas wareega ee kor ku xusan Jaalle Nuur Kadiye Muuse Cumar marka ay ka soo wareegto 15 casho shaacinta Faafinta Rasmiga ah, iyadoo lagu shaacinayo Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

WAXAA LA FARAYAA

In Jeegga Cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle Nuur Kadiye Muuse Cumar, iyadoo la sugaayo muddada kor ku xusan.

Dr. Maxamuud Axmed Faarax
Gudd. Max. Gobolka J/Hoose

IIB MA GALO

FAAFIN RASMIAH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 14aad Muqdisho, 28 Dis. 1986 L. 2 R 12

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

KOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA L. 18, ee 26 Nof. 1986, Xaddidaadda Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS 789

WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA

QAYBTA SADDEXAAD

OGEYSIIS IYO WAX LA MID AH

MAXKAMADDA G. BANAADIR 16 Dis. 1986, Lumid Jeeg War. Lr. 0612289 ku qoran Khadro Faarax Cabdi 843

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10 Dis. 1986, Lumid Jeeg War. Lr. 0108420 ku qoran Faaduma Cilmi Ismaaciil 844

MAXKAMADDA G. BANAADIR 14 Dis. 1986, Lumid Jeeg War. Lr. 0283025 ku qoran Faaduma Cali Maxamed 845

MAXKAMADDA G. TOGDHEER 9 Dis. 1986, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Aamina Cali Cawaale 846

MAXKAMADDA G. BANAADIR 7 Dis. 1986, Lumid Jeeg War. Lr. 0261662 ku qoran Saciido Cilmi Warsame 847

MAXKAMADDA G. BANAADIR 7 Dis. 1986, Lumid Jeeg War. Lr. 007367 ku qoran Saciido Cilmi Warsame 848

MAXKAMADDA G. J/DHEXE 15 Dis. 1986, Lumid Jeeg War. ku qoran Maxamed Aadan Yuusuf 849

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10 Dis. 1986, Lumid Jeeg War. Lr. 0461961 ku qoran Yuusuf Faarax Yuusuf 850

MAXKAMADDA G. W/Galbeed 10 Nof. 1986, Lumid Jeeg War. Lr. 0265643 ku qoran Maxamed Halane Samatar 851

MAXKAMADDA G. BANAADIR 7 Dis. 1986, Dekereeto; Xukun Maxkamadeed 852

Xeer lambar 18, taariikh 26 Noof. 1986
Xaddidaadda Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

Markuu arkay: Sharci lambar 14 ee 3da Juun 1962 ee ku saabsan nidaamka Dawladda iyo beddelaadyadii ka dambeeyey;

Markuu arkay: Qod. 6aad farqadda 2aad Sharciga lambar 30 ee 16ka Noofembar 1986, kuna saabsan Aftida Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

Markuu tixgeliyey: Soo jeedinta Guddoomiyayaasha Maamulka Dawladda ee Degmooyinka;

Markuu tixgeliyey: In ay lagama maarmaan tahay in la xaddido goobaha Cod-bixinta Doorashada kor ku sheegán iyo meelaha ay ka dhismayaan.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Tirada Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa 1646 goobood, waxayna ku cad yihiin lifaaqa Xeerkan.

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa isla maanta, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho 26.11.1986.

(Axmed Suleymaan Cabdalla)
Wasiirka Arrimaha Gudaha

GOBOLKA AWDAL DEGMADA BAKI

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweymaha JDS 1986

DEGMADA BAKI

1. Xaafadda Baki
2. Tuulada Ruqi
3. Tuulada Weeraar
4. Tuulada Cadaad
5. Tuulada Xoorey
6. Tuulada Xeegu
7. Tuulada Walam
8. Tuulada Beysaara
9. Tuulada Q. Qordhiile
10. Tuulada Abuuriin
11. Tuulada Cali Xardh
12. Tuulada Dila
13. Tuulada Cadma-dooni.

13 GOOBOOD DEGMADA BAKI.

GOBOLKA AWDAL DEGMADA SAYLAC

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS 1986

DEGMADA SAYLAC

1. Xaafadda Degmada Saylac (A)
2. Xaafadda Degmada Saylac (B)
3. Tuulada Tuqushi
4. Tuulada Bariisle
5. Tuulada Caasha-cadde
6. Tuulada Ceelgaal
7. Tuulada Jidhi
8. Tuulada Cabdulqaadir
9. Tuulada Xariirad
10. Tuulada Fiqi Aadan.

10 Goobood Degmada Saylac.

GOBOLKA AWDAL DEGMADA LUGHAYE

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS 1986

DEGMADA LUGHAYE

1. Xaafadda Lughaye
2. Samawanaag Tuulo
3. Tuulada Kalawale
4. Tuulada Geerisa
5. Tuulada Karuure
6. Tuulada Farda-xir
7. Tuulada Waraqdhigta
8. Tuulada Bakaa
9. Tuulada Ceela helay
10. Tuulada Ceel Shiikh
11. Tuulada Gargaaro.

11 Goobood Degmada Lughaye.

GOBOLKA AWDAL DEGMADA BOORAME

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS 1986

DEGMADA BOORAME

1. Xaafadda Xalane
2. Xaafadda Axmed Gurey
3. Tuulada Sh. Cali Jowhar
4. Tuulada Qolujeed
5. Tuulada Boon
6. Tuulada Xaliimaale
7. Tuulada Ceel-baxay
8. Tuulada Satawe
9. Tuulada Garacad
10. Tuulada Waraq
11. Tuulada Garacewl
12. Tuulada Walaalgo
13. Tuulada Hawada
14. Tuulada M. Qaloos
15. Tuulada Idhanka
16. Tuulada Abu Qays
17. Tuulada Waxrawaalisley
18. Tuulada Camood.

18 Goobood Degmada Boorame

"GOBOLKA W/GALBEED EE HARGEYSA"

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS Degmada Hargeysa 1986

1. Xarunta Waaxda 26ka Juun
2. Qaybta Faarax Oomaar
3. Xaafadda Tima-cadde
4. Xaafadda Gol-Janno
5. Qaybta Biyo-dhacay
6. Xaafadda Oktoobar
7. Dugsiga Dhexe Biyo-dhacay
8. Dugsiga Sheekh Bashiir
9. Qaybta Axmed Aw-Aadan
10. Dugsiga Xuseen Giire
11. Dugsiga Sheekh Bashiir
12. Qaybta Maxamuud Axmed Cali
13. Dugsiga 21ka Oktoobar
14. Qaybta Sheedaha
15. Xarunta Waaxda Gacan Libaax
16. Xaafadda Oktoobar
17. Xaafadda Sheekh Madar
18. Dugsiga Sh. Yuusuf Al-Kowneyn
19. Qaybta Cumar Ku-joog
20. Dugsiga Biyo-dhacay
21. Xannaanada Carruurta
22. Dugsiga Hargeysada Cusub
23. Qaybta Hillaac
24. Xaafadda Waddo Ceel
25. Xaafadda Hawl-wadaag
26. Qaybta Wiil-Waal
27. Qaybta Hillaac
28. Dugsiga Maroodi Jeex
29. Xaafadda Sh. Yuusuf Al-Kowneyn
30. Xarunta Waaxda Iftiin
31. Qaybta Generaal Daa'uud
32. Qaybta Saba-wanaag
33. Qaybta Oktoobar
34. Dugsiga Farsamada Gacanta
35. Xaafadda Sheekh Xareed
36. Xaafadda Boqol-jire
37. Dugsiga Axmed Gurey
38. Xaafadda Wadajir
39. Xaafadda Horseed

40. Qaybta Heegan
41. Dugsiga 1da Julay
42. Qaybta 1da Julay
43. Dugsiga Malko Durdur
44. X/Waaxda Guryo-Samo
45. Qaybta Xiddigta
46. Qaybta Jamieeco weyn
47. Qaybta Maxamuud Axmed Cali
48. Qaybta Qudhac-dheere
49. Qaybta Laanta Hawada
50. Qaybta Horumar
51. Qaybta Sheekh Nuur
52. Qaybta Sayladda Xoolaha
53. Xaafadda Dabadda Caddaada
54. Xaafadda Gegida Dayuuradaha
55. Tuulada Salaxlay
56. Tuulada Qool-Buullay
57. Tuulada Xadhig-xadhig
58. Tuulada Qoton Dabo
59. Tuulada Dacar-Budhuq
60. Tuulada Balliga Maxamed Axmed
61. Tuulada Darar-Weyn
62. Tuulada Baali Axmed
63. Tuulada Tuulada Lebi-Sagaal
64. Tuulada Balli-Kaliil
65. Tuulada Cali Aaden
66. Tuulada Tuulada Badar-wanaag
67. Tuulada Caadley
68. Tuulada Qori-Jabley
69. Tuulada Sharmarke
70. Tuulada Toon.
71. Tuulada Qool Caday
72. Tuulada Balli Khadar
73. Tuulada Gumar
74. Tuulada Wada Bariis
75. Tuulada Diirato
76. Tuulada Faraweyne
77. Tuulada Wada Khayr
78. Tuulada Illinta Galbeed
79. Tuulada Garabis
80. Tuulada Xubna-weyn
81. Tuulada Cudaley
82. Tuulada Caydaroosh
83. Tuulada Dayma Xunta Galbeed
84. Tuulada Gadka Yogolka

85. Tuulada Dhaboolaq
86. Tuulada Guryo
87. Tuulada Abuu Riin
88. Tuulada Gadhka Warsame Xaad
89. Tuulada Cabdisamad
90. Tuulada Xaraf
91. Tuulada Mareeg
92. Tuulada Geed-deeble
93. Tuulada Horo-Haadlay
94. Tuulada Illinta Dhexe
95. Tuulada Dhubato
96. Tuulada Daba-bahal
97. Tuulada Dhinbil Riyaale
98. Tuulada Sayladda Galbeed
99. Tuulada Gunburaha Banka
100. Tuulada Darfacle
101. Tuulada Habaas weyn
102 Tuulada Aw-Barkhadle
103. Tuulada Abaarso
104. Tuulada Balli Caanood
105. Tuulada Malluugta.

GOOBTA COD-BIXINTA DOORASHADA MADAXWEYNAHA JDS DEGMADA HARGEYSA WAA 105 GOOBOOD

GOBOLKA W/GALBEED DEGMADA BERBERA

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS Degmada Berbera 1986da.

1. Beesha Sheekh
2. Xaafadda Wadajir
3. Xaafadda Barwaaqo
4. Xaafadda Hawlwadaag
5. Tuulada Daragodle
6. Tuulada Lafaruug
7. Tuulada Sheekh Abdaal
8. Tuulada Mandheera
9. Tuulada Laas-Dawaco
10. Tuulada Burco-San
11. Tuulada Xagal
12. Tuulada Laas-Ciise
13. Tuulada Geri

14. Tuulada Buulo-Xaar
15. Tuulada Ceel-Caanood.

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Degmada Berbera waa 15 Goobood

GOBOLKA W/GALBEED DEGMADA GABILEY

Goobaha Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da Degmada Gabiley

1. Degmada Gabiley laba goobood.
2. Tuulada Botor
3. Tuulada Boodhley
4. Tuulada Ijaara
5. Tuulada Taysa
6. Tuulada Xidhinta
7. Tuulada Bun
8. Tuulada Galooley
9. Tuulada Gogayaa
10. Tuulada Agabar
11. Tuulada Ilkaweyne
12. Tuulada Ceel-Bardaale
13. Tuulada Kulmiye
14. Tuulada Geesa-dheer
15. Beesha Arabsiya 2 Goobood B-T
16. Beesha Boqor
17. Beesha Alaybaday 2 Goobood B-T
18. Beesha Wajaale 2 Goobood B-T
19. Tuulada Caada
20. Tuulada Ilma-Daddo
21. Tuulada.

Goobaha Cod-bixinta Degmada Gabiley waa 25 Goobood oo keli ah

GOBOLKA TOGDHEER

Goobaha Cod-bixinta Degmada Burco.

1. Xarunta Xisbiga Degmada Burco
2. Golaha Hanuununta Dadweynaha Xaafadda Sh. Bashiir
3. Laanta 1aad ee Xaafadda Sh. Bashiir
4. Laanta 2aad ee Xaafadda Sh. Bashiir

5. Golaha Hanuuninta Dadweynaha Xaafadda Sayidka
6. Dugsiga farsamada Gacanta Burco
7. Laanta 2aad ee Xaafadda Sayidka
8. Laanta 8aad ee Xaafadda Sayidka
9. Golaha Hanuuninta Dadweynaha Xaafadda Faarax Oomaar
10. Dugsiga 21ka Noofember
11. Dugsiga Sh. Ibraahim
12. Laanta 5aad ee Xaafadda Faarax Oomaar
13. Laanta 1aad ee Xaafadda Faarax Oomaar
14. Tuulada Yiroowe ee Degmada Burco
15. B E E R
16. Magaalo yar
17. Qoryaale
18. Warta Maxamed
19. Taalla Buur
20. Caddow Yaruura
21. Kala Dhac
22. Q O Y T A
23. Ceel Dheere
24. Waraabeeye
25. Harada Gubata Xil
26.
27. Bisiqa Xagarboodhle
28. Yucubyabooh
29. D u r u q s i

GOBOLKA TOGDHEER DEGMADA OODWEYNE

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS Sannadka 1986da ee Degmada Oodweyne

1. Xaafadda Barwaaqo
2. Hawlwadaag
3. Tuulada Xaaxi
4. Tuulada Gatiitaley
5. Tuulada Qalloocato
6. Tuulada Cali-kabood
7. Tuulada Xir-Cadami
8. Tuulada Haro Sheekh
9. Tuulada Qolool
10. Tuulada Cabdi-Dheere
11. Tuulada Cabdi Faarax
12. Tuulada Qudhac-Kudle
13. Tuulada Xatdaanle
14. Tuulada Gudbo
15. Tuulada Baarcad

16. Tuulada Xidhxidh
17. Tuulada Jeenyaaye
18. Tuulada D/Goryaale
19. Tuulada Gobondhaale
20. Tuulada Khaatumo
21. Tuulada L/Mullaaxo
22. Tuulada Ceeg
23. Tuulada Goroyood
24. Tuulada Beerato
25. Tuulada Ceeg Bilicle
26. Tuulada Ceelsame
27. Tuulada Galooley
28. Tuulada Hesego.

Goobaha Cod-bixinta Degmada waa 28 Goobood oo keli ah.

GOBOLKA TOGDHEER — DEGMADA BUUHOODLE

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da — Degmada Buuhoodle

1. Xaafadda Buuhoodle
2. Xaafadda Buuhoodle
3. Tuulada Xararka
4. Tuulada Coodinle
5. Tuulada Qararooyinka
6. Tuulada X/lagu xir
7. Tuulada Balli Cad
8. Tuulada Wirwidh
9. Tuulada Laasa Daar
10. Tuulada Shululux
11. Tuulada Qori Lagu God
12. Tuulada Qabri Lulo
13. Tuulada Balli Calanle
14. Tuulada Horu Fadhi
15. Tuulada Sarmaan Toogo
16. Tuulada Dhallaama-cun
17. Tuulada Balli Dogol
18. Tuulada Tuulada Shan-gale
19. Tuulada Yeeyale.

Goobaha Cod-bixinta Degmada Buuhoodle waa 19 oo keli ah

GOBOLKA TOGDHEER — DEGMADA SHIIKH

Goonaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da — Degmada Shiikh

1. Xaafadda Shiikh
2. Xaafadda Shiikh
3. Xaafadda Suuq-Sade
4. Xaafadda Codi Weyne
5. Xaafadda Codi Yare
6. Xaafadda Hurdise
7. Xaafadda Guugux
8. Xaafadda Gidhays
9. Xaafadda Laalays
10. Xaafadda Dhamiije
11. Xaafadda Bahalalay.

Goobaha Cod-bixinta Degmada Shiikh waa 11 Goobood oo keli ah

GOBOLKA SANAAG:

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Degmada Ceerigaabo — Sannadka 1986da

1. Xaafadda Oktoobar 1 Goob
2. Xaafadda Kulmiye 1 Goob
3. Xaafadda Daalo 1 Goob
4. Tuulada Yuufle
5. Tuulada Codcaanood
6. Tuulada Garmaale
7. Tuulada Dayax
8. Tuulada Yuble
9. Tuulada Burdur
10. Tuulada Gurey
11. Tuulada Xaadh
12. Tuulada Mirisho
13. Tuulada Danan
14. Tuulada Fiqi-Fuliye
15. Tuulada Biyo-Cas
16. Tuulada Ximan Gareen
17. Tuulada Jiidali
18. Tuulada Meydh
19. Tuulada Xiis.

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Degmada Ceerigaabo waa 19 Goobood

GOBOLKA SANAAG: — DEGMADA BADHAN

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Degmada Badhan 1986da:

1. Magaalada Badhan 1 Goob
2. Tuulada Ceel-Larifey
3. Tuulada Guryo-Samo
4. Tuulada Bagaad
5. Tuulada Dooxo-dheer
6. Tuulada R A D
7. Tuulada Cowsane
8. Tuulada Mindigale
9. Tuulada Buraan
10. Tuulada Dahar
11. Tuulada Ceel-Budh
12. Tuulada Hadaaftimo
13. Tuulada Sibaayo
14. Tuulada Baraagta Qal
15. Tuulada Laas-Qoray
16. Tuulada Xidid
17. Tuulada Xingalool
18. Tuulada Ceelaayo
19. Tuulada Maraje.

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Degmada Badhan waa 19 Goobood

GOBOLKA SANAAG:

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Degmada Ceel-Afweyn 1986da

1. Degmada Ceel-Afweyne 2 Goobood
2. Beesha Bixin
3. Beesha Kalsheekh
4. Beesha Gar-Adag
5. Beesha Huluul
6. Beesha Barkhadle
7. Beesha Dhuur-Cillaan
8. Beesha Laas-Doomaare
9. Beesha Fadhi Gaab.

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Degmada Ceel-Afweyn waa 10 Goobood oo keli ah

GOBOLKA SOOL, DEGMADA LAAS-CAANOOD

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da

1. Xaafadda Heegan
2. Xaafadda Wadajir
3. Tuulada Guuneys
4. Tuulada Yagoori
5. Tuulada Ari-Caddeeye
6. Tuulada Xidh-Xidh
7. Tuulada Kala-Baydh
8. Tuulada Daba-Taag
9. Tuulada Dharkeyn Geenyo
10. Tuulada Saax-Dheer
11. Tuulada Qorile
12. Tuulada Karin Dabayl Weyn
13. Tuulada Dhuray
14. Tuulada Karin Gorfood
15. Tuulada Boocane
16. Tuulada Tuke Raq
17. Tuulada Gambadhe
18. Tuulada Yabeel Ceel la cabo

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Degmada Laas-Caanood waa 18 Goobood oo keli ah

GOBOLKA SOOL — DEGMADA XUDDUN

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da

DEGMADA XUDDUN

1. Xaafadda Koowaad ee Degmada
2. Tuulada Bohol
3. Tuulada Sin-Carro
4. Tuulada Fara-Weyn
5. Tuulada Darar-Weyn
6. Tuulada Aadan Kudul
7. Tuulada Kulaal
8. Tuulada Xamale Xagarre

9. Tuulada Hol-Hol
10. Tuulada Caday Duur
11. Tuulada Jidbaale
12. Tuulada Uur-Boogays
13. Tuulada Tuulada Xabaalo Camarre.

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Degmada Xuddun waa 13 Goobood oo keli ah

GOBOLKA SOOL — DEGMADA CAYNABO

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da — Degmada Caynabo 1986da

1. Xaafadda Caynabo (2) Goobood
2. Tuulada O O G
3. Tuulada Habar Heshay
4. Tuulada Badweyne
5. Tuulada Balanbal
6. Tuulada Tukub
7. Tuulada Gadhgurmeed
8. Tuulada Barkadda Cali Xersi
9. Tuulada Ceel-Dhaab
10. Tuulada Waridaad
11. Tuulada Xayra
12. Tuulada Dhadhamo
13. Tuulada Wadamugu
14. Tuulada Yiceyle
15. Tuulada Qori-Dheere
16. Tuulada Gawsaweyne.

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Degmada Caynabo waa 17 Goobood oo keli ah

GOBOLKA SOOL — DEGMADA TALEEX:

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da

Degmada Taleex

1. Xaafadda Gudaheeda
2. Xaafadda Xalane
3. Tuulada Carrooley
4. Tuulada Gudu'aalo
5. Tuulada Sarmaanyo
6. Tuulada Ceel Kalcad
7. Tuulada Laaso Dawaco
8. Tuulada Laaso Curdon
9. Tuulada Ceel Dhidaayo
10. Tuulada Indha-Gube
11. Tuulada Bohol Waraabe
12. Tuulada Bahan Qawlood
13. Tuulada Habri Ku-dhugatay
14. Tuulada Dhumay
15. Tuulada Qabno Ayax
16. Tuulada D o o l o.

Goobaha Cod-bixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Degmada Taleex waa 16 Goobood oo keli ah.

GOBOLKA BARI, DEGMADA BOSAASO

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da ee Degmada Boosaaso.

1. Xaafadda Biyo Kulule
2. Xaafadda Baalale
3. Xaafadda Karin
4. Goobta Shaqaalaha Degmada
5. Xaafadda Ceel Daahir
6. Xaafadda Laaso Dawaco
7. Xaafadda Juuraale
8. Xaafadda Kobdhexaad
9. Xaafadda
10. Xaafadda Gal Gala
11. Xaafadda Jiingada

12. Xaafadda Ufayn

12 Goobood

GOBOLKA BARI-DEGMADA B/BEYLA

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 86da, ee Degmada Bandar Beyla

1. Xaafadda Danwadaagta Magaalada
2. Xaafadda B/Wagaan Magaaladda
3. Beesha Dheewado Hoose
4. Beesha Dheewado Sare
5. Tuulada Xumbeys
6. Ceelka Laasboxay
7. Carar
8. Suuj
9. Cares
10. Buldarkeed
11. Daara Goomood
12. Ceelka Looxane

12 Goobood

GOBOLKA BARI-DEGMADA QANDALA

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986 Degmada Qandala

1. Xaafadda Qandala
2. Xaafadda Buur
3. Tuulada Dhaadaal
4. Tuulada Ceel Miraale
5. Tuulada Ceel Dhaashane
6. Tuulada Xijiijle
7. Tuulada Ceel Car-Gey
8. Tuulada Baalli-Dhidin
9. Tuulada Ceel Abaaro
10. Tuulada Buq Catooti
11. Tuulada Billi Wacatay
12. Tuulada Ceel Guda
13. Tuulada Ceel Biraale
14. Tuulada Karimo
15. Tuulada Unuun
16. Tuulada Ceel Gaal

16 Goobood

GOBOLKA BARI, DEGMADA ISKUSHUBAN

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da ee Degmada Iskushuban

1. Xaafadda Iskushuban
2. Xaafadda Kobdhexaad
3. Xaafadda Dhuudhooyo
4. Xaafadda Balli Sanweyne
5. Xaafadda Rako
6. Xaafadda Qodaxkoomo
7. Xaafadda Kalgoble
8. Xaafadda Dharoor
9. Xaafadda Camaan
10. Xaafadda Jaceel
11. Xaafadda Iskoomsaar
12. Xaafadda Gargoore
13. Xaafadda Hurdiya
14. Xaafadda Xaafuun
15. Xaafadda Baargaal
16. Xaafadda Ismadhaqa

17. Xaafadda Coomayo
18. Xaafadda Okode
19. Xaafadda Xirro Xiriiro
20. Xaafadda Dabar.

20 Goobood

GOBOLKA BARI-DEGMADA CALUULA

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986 Degmada Caluula

1. Xaafadda Degmada Caluula Hal Goob
2. Xaafadda Booli Moog
3. Tuulada Dhurbo
4. Tuulada Sayn Weyn
5. Tuulada Sayn Yar
6. Tuulada Tooxid
7. Tuulada Bareeda
8. Tuulada Ceel Quud
9. Tuulada Gal Weyn
10. Tuulada Kamaare
11. Tuulada Khalmade
12. Tuulada Goosalay
13. Tuulada Murcanyo

13 Goobood

GOBOLKA BARI-DEGMADA QARDHO

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da Degmada Qardho

1. Xaafadda Xorgoble
2. Xaafadda Wadajir
3. Tuulada Dhaxan
4. Tuulada Yaka
5. Tuulada Labow
6. Tuulada Iskushub
7. Tuulada Awsamme
8. Tuulada Kalixeed
9. Tuulada Ban-Goray
10. Tuulada Ceel Buur
11. Tuulada Laasa-Jidad
12. Tuulada Libaax Har
13. Tuulada Adain Soone

14. Tuulada Sheerbi
15. Tuulada Xiddo
16. Tuulada Waa-Ciye
17. Tuulada Qayaasale
18. Tuulada Dalweyn
19. Tuulada Guud-Cad
20. Tuulada Xabaal Reer
21. Tuulada Canbaar Sare
22. Tuulada Canbaar Hoose
23. Tuulada Dangoroyo

23 Goobood

GOBOLKA NUGAAL, DEGMADA GAROOWE

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da ee Degmada Garoowe.

1. Xaafadda Wadajir
2. Xaafadda Hantiwadaag
3. Xaafadda Waaberi
4. Xaafadda Berdidawaco
5. Beesha Jillab
6. Beesha Rabable
7. Beesha Kala'Beyr
8. Beesha Warweyteen
9. Beesha Awrculus
10. Beesha Laqlaajisle
11. Beesha Baley
12. Beesha Cadda Dheere
13. Beesha Barjedaale
14. Beesha Quwaxood
15. Beesha Kalis
16. Beesha Sin u Jiif
17. Beesha Daara dhabe
18. Beesha Xamuur
19. Beesha Reebanti
20. Kantaroolka

20 Goobood

GOBOLKA NUGAAL, DEGMADA EYL

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da ee Degmada Eyl.

1. Magaalada Gudaheeda Darawiish
2. Magaalada Gudaheeda Waaberi Baday
3. Beesha Danwadaagta
4. Beesha Danwadaagta
5. Beesha Xasbahal
6. Beesha Diganle
7. Beesha Godob Jiraan
8. Beesha Qarxis
9. Beesha Dudunbuto
10. Beesha Uusgure
11. Beesha Gaadsaaran
12. Beesha Odoodol
13. Beesha Basayr
14. Beesha Bura Weyn
15. Beesha Shan Booqay
16. Beesha Gardeen.

16 Goobood

GOBOLKA NUGAAL, DEGMADA BURTINLE

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da ee Degmada Burtinle.

1. Xaafadda Hawl Wadaag
2. Xaafadda Horumar
3. Tuulada Malasle
4. Tuulada Qalanqal
5. Tuulada Meeyrsamo
6. Tuulada Godob Yar
7. Tuulada Cadey Gabagabo
8. Tuulada Balli Dacar
9. Tuulada Magacley
10. Tuulada Jalam.

20Goobood

GOBOLKA MUDUG DEGMADA GAALKACYO

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da ee Degmada Gaalkacyo.

1. Xaafadda Wadajir (A)
2. Xaafadda Wadajir (B)
3. Xaafadda Horumar
4. Xaafadda Israac
5. Xaafadda Garsoor
6. Dugsiga Sare Cumar Samatar
7. Tuulada Xarfo
8. Tuulada Bacaadweyn
9. Tuulada Bandiiradley
10. Tuulada Seddex Xiglo
11. Tuulada Dagaari
12. Tuulada Hilmo
13. Tuulada Dorol
14. Tuulada Qarqoora
15. Tuulada Bitaale
16. Tuulada Abaarey
17. Tuulada Gacnafle
18. Tuulada Godod
19. Tuulada Halaboqad
20. Tuulada Lagu raqsey
21. Tuulada Balli Boos

21 Goobood

GOBOLKA MUDUG DEGMADA XARARDHEERE

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da ee Degmada Xarardheere.

1. Xaafadda Hawlwadaag
2. Xaafadda Wadajir
3. Xaafadda Heegan
4. Tuulada Dhawe
5. Tuulada Ris
6. Tuulada Kulmis
7. Tuulada Hodan
8. Tuulada Caad
9. Tuulada Qosol Tuure
10. Tuulada Ceel Huur
11. Tuulada Waax Weyn
12. Tuulada Camaaro
13. Tuulada Niiroon.

13 Goobood

GOBOLKA MUDUG DEGMADA HOBYO

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da ee Degmada Hobyo.

1. Degmada Wadajir
2. Degmada Hawl Wadaag
3. Tuulada Wisil
4. Tuulada Ceelguulaa
5. Tuulada Wargala
6. Tuulada Xingod
7. Tuulada Bacaad Weyn
8. Tuulada Af Gaduudle
9. Tuulada Gawaan
10. Tuulada Ceel Ducaale
11. Tuulada Saqiiro
12. Tuulada Bajeela
13. Tuulada Dejinaale
14. Tuulada Subuule.

14 Goobood

GOBOLKA MUDUG DEGMADA JARIIBAN

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da ee Degmada Jariiban.

1. Xaafadda Horumar
2. Xaafadda Horseed
3. Tuulada Seemade
4. Tuulada Kalmoole
5. Tuulada Salax
6. Tuulada Ceel la Helay
7. Tuulada Ceel Xamure
8. Tuulada Qoor Geesodheere
9. Tuulada C/berdaale
10. Tuulada Garacad
11. Tuulada Dhinowda
12. Tuulada Afabarwaaqo
13. Tuulada Bali busle
14. Tuulada Buubi
15. Tuulada Mayle

15 Goobood

GOBOLKA MUDUG DEGMADA GALDOGOB

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da ee Degmada Galdogob.

1. Xaafadda Bayra
2. Tuulada Jiic Faroole
3. Tuulada Xero Jaalle
4. Tuulada Shagalle
5. Tuulada Qansaxle
6. Tuulada Taaloole
7. Tuulada Saaxa Qoron
8. Tuulada Gowlalo
9. Tuulada Roox
10. Tuulada Bur Saalax

10 Goobood

GOBOLKA GALGADUUD DH/MAREEB

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da ee Degmada Dh/Mareeb.

1. Xaafadda Dayax
2. Xaafadda Balicad
3. Xaafadda Horseed
4. Xaafadda Waaberi
5. Xarunta Q. 21aad
6. Beesha Guri Ceel
7. Beesha Guri Ceel
8. Beesha Guri Ceel
9. Beesha Ceel Dheere
10. Beesha Mereergur
11. Beesha Gaddoon
12. Beesha Bulacle

12 Goobood

GOBOLKA GALGADUUD DH/MAREEB

Goobaha Codbixinta Doorashada Madaxweynaha JDS, Sannadka 1986da ee Degmada C/Buur.

1. Xaafadda Wadajir 1 Goob
2. Xaafadda Wadajir 1 Goob
3. Beesha Ruun Dhirtaar
4. Beesha Galhareeri

5. Beesha Garable
6. Beesha Bargaan
7. Beesha Jacar
8. Beesha Darri
9. Beesha Dac
10. Beesha Wabxo
11. Beesha War Xoolo
